# X-nidaameedka hannaanka shaqo & anshaxa xubnaha golaha xildhibaanada D.D.S

## X/Nidaameed Tirsi 1/2002

## X/nidaameedka Hanaanka Shaqo iyo Anshax ee Xubnaha Golaha Xildhibaanada Deegaanka Soomaalida

Madaama ay lagama maar maan tahay in golaha deegaanka soomaalidu u xilka iyo wajibaadka lagu siiyay dastuurka dib loo habeeyay ee deegaanka iyo masuuliyada u shacabku u idmaday in ay si habsami leh uga soo baxo waxaa haboon in si hufan loo qeexo awoodaha iyo wajibaadyada, qaab-dhiismeedka gudaha iyo hanaanka shaqo ee golaha.

Madaama ay haboontahay in la bayaamiyo hanaanka xubnaha golaha iyo xisbiyadu ay hawlaha golaha kaalin muhiima ah iyo ka qaybgal sare uga qatan Lana qeexo hanaanka nidaam iyo anshax ee xubnaha goluhu marka ay gudanayan shaqadooda ay racayaan.

Madaama la aminsan yahay in xuquuqaha, wajibaadka xubnaha golaha iyo qaab-dhiismeedka wakiilada xisbiyada golaha kuurasta ku leh oo si hufan loo bayaamiyo ay ahmiyad wayn u leedahay dardargalinta hawlaha golaha iyo ilaalinta karamada iyo sharafta golaha.

Madaama loo bahday in la soo saaro xeer dhamaystiran, hufan oo sahlayaa qaabilada kala duwaananshaha fikir, xushmaynta go'aanada codka aqlabiyada islamarkaana dheegaysanayaa fikirka codka tirada yar oo kobcinayaa hab dhaqanka

dimoqraadiyaadeed Lana janqadayaa shuruucda dalka iyo mabadiida, hananada shaqo iyo wayo-aragnimada barlaaman ee calaamiga.

Sidaas awgeed, golaha xildhibaanada ee deegaanka soomaalidu isagoo ka duulaya awooda lagu siiyay Qodobka 55(3) ee dastuurka dib loo habeeyay ee deegaanka wuxuu soo saray xeerkan.

## Qaybta Koowaad

## Guud Ahaan

**Qodobka 1aad :-Ciwaan Gaaban**

X/nidaameedkan waxaa loogu yeedhi karaa '' **X/nidaameedka Hanaanka Shaqo iyo Anshax ee Xubnaha Golaha Xildhibaanada ee Deegaanka Soomaalida, X/nidaameed Tirsi 1/2002''.**

**Qodobka 2aad:- Qeexid**

Haddan haboonaanta eraygu macne kale siin xeerkan dhexdiisa;

1. ''**Dastuu**r'' waxaa loola jeeda dastuurka dib loo habeeyay ee deegaanka soomaalida.
2. **''Gole''** waxaa loola jeedaa golaha xildhibaanada ee deegaanka soomaalida.
3. '**Afhayeen**'' waxaa loola jeedaa afhayeenka golaha xildhibaanada ee deegaanka soomaalida
4. **'Gudi ama gudiyo''** waxaa loola jeedaa gudiyada uu goluhu u asaaso inay fuliyaan shaqooyinka golaha, kuwaas oo ka kooban

gudi xidhiidhin, gudi joogto ah, gudi ku meel gaadh ah ama gudi hoosaad.

5. **''Hogaaminta Guddi**'' waxaa loola jeeda gudoomiyaha ama ku xigeenka hogaamiyaa guddiyada kala geedi-san ee golaha.
6. ''**Xafiis'**'waxaa loola jeedaa xafiiska golaha xildhibaanada.
7. '**'Hayadaha dawliga''** waxaa loola jeedaa hayadaha u goluhu si toos ah u dabagalo islamarkaana u maamulo ee ku shaqeeya miisaaniyad ay dawladu u qoondayso.
8. **''Hayadaha fulinta**''waxaa loola jeedaa hay'adaha dawliga ee toos u hoostaga golaha hawlfulinta deegaanka ee goluhu kormeer iyo dabagal ku sameeyo.
9. **''Sharciga Qabyada ee dawlada''** waxaa loola jeedaa qormada Sharci qabyo ah ee ay hayada fulintu golaha hor keento.
10. ''**Fahansiiye**'' waxaa loola jeedaa hayad ama shaqsi uu goluhu ama gudi ugu yeedhay in uu sharaxad ka bixiyo sharci qabyo ah ama arrimo kale.
11. **'Marti Sharaf** '' waxaa loola jeedaa cidkasta oo uu goluhu ku Marti qaado inay hawlaha golaha goob jog ka noqdaan.
12. ''**Haybada Golaha''** waxaa loola jeedaa hab wafaaqsan saraynta golaha ee lagu qeexay dastuurka xushmada iyo sharafta uu goluhu ku dhexe leeyehay hayadaha dawlada iyo bulshada dhexdeedaba.
13. '**'Dhaqamada Reeban''** waxaa loola jeedaa ficilada aan ku haboonayn sharafta iyo karamada golaha sida sakhrad, gogoldhaf, caadaysiga meelaha aan munaasabka ahayn, khiyaamada iwm.

14. ‘.’’**Ururada bulshada’’** waxaa loola jeedaa ururada xirfadlayaasha, ururada haweenka, dhalinyarada iyo kuwa la halmala ee deegaanka.

15. ‘**Xubin**’’ waxaa loola jeedaa xubnaha golaha xildhibaanada deegaanka.

**16. ’’cod aqlabiyada ah’’** waxaa loola jeeda kadib marka la xaqijiyo kooramka uu ku qabsoomo shirku, codka inta badan ee xubnuhu ay tageeran (50%+1).

17. ‘‘**Xasaanad**’’ waxaa loola jeedaa xuquuqada xildhibaanada golaha lagu siiyay Qodobka 48[aad] ee dastuurka.

18. **‘’Sixitaanka Farsamo**” waxaa loo jeedaa sixitaanka luuqadeed iyo khaladada yaryar ee aan dhalan rog ku keenayn nuxurka sharciga hore loo ansixiyay.

19. ‘’**wakiilka dawlada’’** waxaa loola jeedaa xubin ka tirsan golaha oo loo xilsaaray in golaha dhexdiisa ka qabto ama iskudubaro hawlaha xisbi ee xisbiga/asxaabta kuuras aqlabiyada ah ku leh golaha.

20. ‘’**Wakiil Xisbi’’** waxaa loola jeedaa xubnaha ka tirsan golaha ee matalayaa xisbiyada golaha ku leh kuuras dhan toban iyo wax ka badan oo iskudubarida islamarkaana hogaamiyaa hawlaha xisbi ee golaha.

21. ‘’**Xisbiga Koowaad ee Mucaaridka’’** waxaa loola jeeda marka laga reebo xisbiga/asxaabta aqlabiyada ku leh golaha, xisbiga kale ee ku xiga ee ugu kurasta badan.

**Qodobka 3[aad] <u>Fasiirada</u>**

1. God-daloolada sharci ee laga la kulmo dhaqangalinta x/nidameedkan iyadoo la racayo waayo-aragnimada golaha deegaanka, golaha wakiilada shacabka iyo hanaanada shaqo ee barlaamanada caalamiga iyo shuruucda dalka iyo deegaanka laguna xisaabtamayo culayska arinta ayaa god-daloolada sharci lagu daboolayo la soo saari.

2. Arrinta ku cad farqada 1aad ee qodobkan hanaan ka hor imanayaa qodobada qeexan ee dastuurka deegaanka iyo Dawlada federaalka iyo sidoo kale, shuruucda kale ee deegaanka iyo dalka looma fulin karo.
3. Hanaanka shaqo ee guddiyada God-daloolada Xeerkan dhaxdiisa ka soo baxaa waxaa lagu buuxin (daooli) iyadoo la racayo hanaanka guud ee shaqo ee golaha.

**Qodobka 4aad:-** **<u>Fasiirada Jinsiga</u>**

Arrimaha u x/nidaameedkani uu dhigay labka, dhidigana wuu khuseeyaa.

## <u>Qaybta Labad</u>

## <u>Qaab-dhismeedka iyo Wajibaadka Guud ee Golaha</u>

**Qodobka 5aad** **<u>Qaab-dhismeedka Guud ee Golaha</u>**

1. Qaab-dhismeedka guud ee goluhu waa sida hoos ku cad;
   - b.) kalfadhiga golaha.
   - t.) Guddiyo kala geedisan
   - j). Xafiiska Golaha

x). Qaabdhismeedka xisbiyada siyaasadeed

kh). Xafiiska af-hayeenka

2. Goluhu wuxuu yeelan astaan ama loogo u gaara
3. Qaab-dhismeedka iyo xilka iyo wajibaadka xafiiska waxaa go'aamin bayaanka lagu aas-aasay xafiiska**.**

**Qodobka 6aad** **<u>Wajibaadada Guud ee Golaha</u>**

1. Goluhu wuxuu leeyahay xilka iyo wajibaadyada lagu siiyay Qodobada dastuurka oo kala ah.

b.) soo saarista shuruucda kala duwan.

t). daba galka iyo kormeerka hanaanka shaqo iyo waxaqabad ee hay'adaha fulinta iyo hay'adaha kale ee dawliga ee golaha hawl fulinta hoos taga, hay'ada garsoorka iyo hanti-dhawrka guud isla markaana wuxuu wax waydiin ama su'aal ugu yeedha mas'uuliyintooda, markasta oo loo bahdana talaabo ka qaadaa.

j.) wuxuu dhisaa guddiyo iyo qaybaha kale ee golaha islamarkaana dheegaystaa warbixinada waxqabadkooda shaqo.

x). wuxuu magacaabaa ama ansixiyaa magacaabista masuuliyiinta dawlada deegaanka ee u goluhu magaacabo.

Kh.) Wuxuu sahlaa xalaadaha ku haboon in xubnaha goluhu la kulmaan bulshadii soo doorotay islamarkaana meelmariya siyaabaha lagu sugayo danaha iyo rabitaanada bulshada ay meetalan.

d). wuxuu dhagaysta cabashooyinka iyo xogaha hay'adeed iyo qaybaha bulshada kala duwan.

r). wuxuu taageero farsamo siiyaa golayaasha degmooyinka iyo tuulooyinka ee lagu dhisay hab wafaaqsan qodobada 75 iyo 89 ee dastuurka isla markaana daba gala waxqabadkooda.

s).wuxuu fuliyaa hawlaha iyo wajibaadyada kale ee la halmaala awoodaha golaha.

2. Goluhu marka uu fulinayo xilalka iyo wajibaadyada kor lagu xusay wuxuu ku salaynayaa isla markaana raacayaa habka iyo mabaadiida hoos ku cad;

b). Isagoo raacayaa ama duulaya qorsheyaasha muddada fog iyo kuwa muddada gaaban.

t). Isagoo meelmarinaya qiimayn shaqo.

j). Isagoo abuuraya jawiga ku haboon in shaqooyinka loo qabto hanaan midho dhal ah.

x). Isagoo raacaya mabaadiida cad caddaanta iyo la xisaabtan.

Kh). Iyadoo la raacayo mabaadiida kale ee maamulka suuban.

**Qodobka7aad. Mudada Shaqo Ee Golaha**

1. Mudada shaqo ee goluhu waa Shan sano.
2. Goluhu sanadkiiba mudo aan ka yarayn laba jeer ayuu shir caadiyaa yeelan.

3. Shirka caadiga ee golaha hadaan duruufo ka baxsan awooda ayna bedelin wuxuu qabsoomi Mudada u dhaxaysa.

b). 15ka Hamle ilaa 20ka Hamle

t). 15 ka Tir ilaa 20ka Tir

4. Shirka deg-dega ee golaha waxaa la qaban karaa markasta oo loo baahdo.

**Qodobka 8aad. <u>Shirka Furitaanka Golaha</u>**

1. Kadib marka la qabto doorashada guud shirka ugu horeeya ee golaha cusub wuxuu afhayeenka ama afhayeen ku xigeenka golihii hore iskugu yeedha bil gudaheed dhamaadka mudadii shaqo ee golaha hore.
2. Afhayeenka ama afhayeen ku-xigeenkii hore kadib marka uu xaqijiyo kooramka hogaanka wuxuu ku wareejin godoomiyaha maxkamada guud ama kuxigeenka maxkamada guud
3. Gudoomiyaha ama ku xigeenka maxkamada guud ee deegaanku hab waafaqsan x/nidaameedkan ayuu afhayeenka iyo ku xigeenka golaha ku doorsiin.
4. Afhayeenka iyo ku xigeenka golaha ee la doortay waxay Mari dhaar.
5. Afhayeenka la doortay kadib marka uu xilka kala wareego afhayeenkii hore wuxuu hogaamin shirka golaha
6. Goluhu furitaanka shirka ugu horeeya ee mudadiisa shaqo ama shir kasta oo uu yeelanayo wuxuu ku furi heesta calanka

deegaanka iyo hanaanada kale ee lagama maar maanka u ah furitaanka shirka.

7. Arinta ku cad farqada 1aad ee sare waxaa dheer oo la samayn

b. Afhayeenkii hore wuxuu soo jeedin khudbad uu ku xaqiijinayo bilaabitaanka shaqada golaha cusub.

t. Xubnaha waxaa dhaarin gudoomiyaha ama ku-xigeenka maxkamada guud ee deegaanka.

j. Dulucda dhaartu waxay noqon;

''***Anigoo ah ----------------------------------- maanta waxaan ku dharanayaa islamarkaana balanqadaya aniga oo ka tirsan golahan marka an shaqadayda bilaabo in an dastuurka iyo bulshada deegaankaba an daacad u noqon isla markaana masuuliyada ii saaran si daacadnimo oo fir-fircooni ku dheehantahay isla markaana waafaqsan sharciga iyo hanaanada shaqo an raco***.''

X). xubin kasta oo ka tirsan goluhu wuxuu wajibaad ka saaran yahay inuu maro dhaarta kor ku cad. Xubinka aan dhaarta Marin afhayeenku wuxuu ka hakin shirka kadibna hab waafaqsan qodobka 109 ee xeerkan ayaa lagu go-aansiin. Hase ahaatee, hadii afhayeenku u ku qanco jiritaanka sobobo maangal ah oo uu xubinku wakhtiga ku haboon uu ku Mari waayay maalmaha ka baxsan maalinta kor ku cad ayuu xafiiska ku dhaarin karaa.

Kh. wuxuu magacaabaa madaxwaynaha dawlada deegaanka.

**Qodobka 9aad.<u>Habka doorashada afhayeenka iyo ku xigeenka</u>**

1. Goluhu hab wafaaqsan Qodobka 49aad (3, X) ee dastuurka wuxuu iska dhex dooran afhayeen iyo ku xigeen hogaaminaya golaha.
2. Afhayeenka iyo ku xigeenka waxaa lagu dooran furitaanka kalfadhiga ugu horeeya ee golaha cusub ee la soo doortay iyadoo u kalfadhiga uu hogaaminayo Gudoomiyaha ama ku-xigeenka maxkamada guud ee deegaanka.
3. Doorashada Af-hayeenka waxaa loo fulin habka hoos ku cad;

   b). Hab wafaaqsan qodobka 50aad (2) ee dastuurka xubin wakiil ah xisbiga /asxaabta aqlabiyada ku leh kuraasta golaha ayaa inu afhayeenka golaha u soo bandhigo shir gudoonku fursad u siin.

   t). Xubinku afhayeenka u soo bandhigay wuxuu ka bixin sharaaxad kooban oo qeexaysa shakhsiyadiisa goluhuna musharaaxa la soo banghigay toos ayuu u qadan oo ansixin.

   j). Af-hayeenka cusubi marka la dhaariyo intu afhayeenkii hore kala wareejo xilka ayuu hogaamin shirka.
4. Hanaanka doorasho ee af-hayeenka ee ku cad qodobkani wuxuu sidoo kale, dhaqangal ku yahay hanaanka doorasho ee af-hayeen ku-xigeenka.
5. Haddii Af-hayeenka ama ku-xigeenku sababo kala duwan awgeed, shaqada uga tagaan iyadoo ayna gaadhin mudada shaqo ee Af-hayeenka iyadoo u hogaaminayo afhayeenka ama ku xigeenku shaqadu hayaa ayaa habka lagu cadeeyay qodobkan iyadoo la racayo xubnaha golaha laga dhex dooran.
6. Haddii mudada shaqo oo aan gaadhin ay halmar Af-hayeenka iyo ku-xigeenkuba shaqada ka tagaan gudoomiyaha

ama ku-xigeenka maxkamada guud ee deegaanku iyadoo u shirka hogaaminayo ayaa hanaanka u dhigayo qodobkani lagu dooran.

**7.** Afhayeenka iyo ku-xigeenka la doortay Hab waafaqsan Qodobka 70aad ee xeerkan inta ayna shaqada bilaabin ka hor ayaa lagu dhaarin.

**Qodobka 10aad <u>Awoodaha iyo Wajibaadka Af-Hayeenka & Ku-Xigeenka</u>**

1. Af-hayeenku wuxuu yeelan awoodaha iyo wajibaadka hoos ku cad;

b). wuxuu dusha ka hagaa islamarkaana maamulaa golaha.

t). wuxuu hogaamiyaa shirarka golaha, sugaa nidaamka, iclaamiyaa shirarka caadiga iyo kuwa deg-dega ee golaha.

j). marka u shirku socdo su'aalaha fasiilaad ee yimaada ayuu hab wafaaqsan qodobka 3aad ee xeerkan go'aamin ama ku fasili ama qaybaha ay khuseeyso u gudbin.

x). Gudoomiyayaasha, ku xigeenada iyo xubnaha kale ee guddiyada iyo sidoo kale xubnaha hab waafaqsan sharciga golaha u matalaya ha'yada ayuu soo xulaa si loo doorto isla markaana inay matalaan ayuu suurta geliyaa.

Kh).Wuxuu isku dubaridaa shaqooyinka guddiyada joogtada ah.

d). Wuxuu dhisaa isla markaana hogaamiyaa guddiga xidhiidhinta.

r). Isagoo golaha matalaya ayuu xidhiidh sameeyaa.

s). Wuxuu magacaaba isla markaana hawl galiyaa qeybaha sharci ahaan Afhayeenka hoos taga.

Sh). Wuxuu dhaqan geliyaa go'aanada anshax ee goluhu ka qaato xubnihiisa.

Dh). Wuxuu qabtaa shaqooyinka kale ee goluhu u xilsaaro.

c). Wuxuu qoraal afhayeen-ku xigeenka ugu wakiilan ama u xilsaari karaa qeyb ka mid ah awoodaha iyo wajibaadyadiisa shaqo.

1. Afhayeen-kuxigeenku wuxuu leeyahay awoodahan iyo waajibaadyadan hoos ku cad:-

b). Marka uu Afhayeenku maqan yahay ama uu go'aansado in uuna diyaar u ahayn inu shirka golaha ka qeyb galo ayuu isagoo afhayeenka matalaya u shaqeyn.

t). Wuxuu qabtaa shaqooyinka kale ee uu goluhu u xilsaaro ama Afhayeenku uu Qoraal ama af ugu xilsaaro.

## Qaybta Sadexaad

## Nidaamka iyo Noocyada Shirarka ee Golaha

### Qodobka 11aad. Noocyada Shirka ee Golaha

Goluhu wuxuu yeelan noocyada shir ee hoos ku xusan;

1. Shir caadi ah
2. Shir deg-deg ah iyo
3. Shir albaabadu u xidhan yahay

### Qodobka 12aad. Shir Caadiya

1. Shirka caadiga ah waxaa loola jeedaa shirka u goluhu sanadiiba mudo laba jeer aan ka yaraan uu si rasmi u yeesho.

2. Shirka caadiga ee golaha waxaa si joogta ah loogu qaban hoolka shirarka ee goluhu ugu talagalay.

**Qodobka 13aad .<u>Shir Deg-Dega</u>**

1. Waa shirka la iskugu yeedho golaha Markasta oo ay dhacdo xaalad degdeg ah oo u baahan ka go’aan-qadashada golaha**.**
2. Kadib marka la iskugu yeedho shir deg-deg ah ilaa xal loo helayo arinta loogu yeedhay wuxuu shirka goluhu ka socon goobta iyo saacad ku haboon.
3. Iyadoo arimaha ku xusan farqadda 1aad ee qodobkani ay sidooda yihiin ayaa waxaa waajib ku ah afhayeenka inuu ku baaqo shir deg deg ah marka 1/3 sadeex meelood meel xubnaha golaha ay codsadaan shir deg-deg ah.
4. Shirka deg-dega ah ee golaha wuxuu ka dhici meelkasta oo afhayeenku u arko inay ku haboon tahay.

**Qodobka 14aad Shir Albaabadu u xidhan yahay**

1. Shirka golaha waxaa loo qaban qaab fagaare furan ah. hase ahaatee, hab wafaaqsan hanaanka ku cad farqada 2aad ee hoose ayaa shir qarsoodi ah lagu qaban karaa.
2. Shirka golaha in loo qabto hanaan qarsoodi ah marka xubnaha goluhu ama hayada fulintu codsato islamarkaana kala badh in ka badan xubnaha goluhu ay taageeraan waxaa la qaban shir qarsoodi ah.
3. Saacada iyo goobta shirka qarsoodiga ah waxaa go-aamin afhayeenka

**Qodobka15aad.U Baaqidda Shirarka**

1. Markastoo la qabanayo shirarka caadiga ah ee golaha afhayeenku isagoo adeegsanaya nidaamyada kala duwan ee warbaahineed waa inuu ka hor maalinta, goobta sacaada shirka xubnaha golaha ku wargaliyo.
2. Ucilaaminta kadib hadii ay dhacaan arimo kadis ah oo soboba in shirku qabsoomi Karin afhayeenku waa inu ogaysiis ku saabsan arintaas xubnaha golaha u soo dhajiyo.
3. Af-hayeenku ama 1/3 xubnaha goluhu marka ay codsadan in shir deg-deg la qabto waa inu af-hayeenku ku baaqo shir deg-deg ah.
4. Nidaamyada warbaahineed ee uu afhayeenku u adeegsanayo ku baaqida shirka waxay noqon kuwo xubnaha golaha iyo cidkasta oo ay khusaysaba u sahlaysa inay maqasho, ogaato ama akhrido.

**Qodobka16aad. <u>Qaabka Fadhiga iyo Boratakoolka shirka</u>**

1. Baratakoolka xubnaha golaha:

b). xubinkasta oo ka tirsan golaha waxaa looga baahanyahay in wakhtiyada shirarka golaha uu soo xidho labis u qalma haybada iyo karaamada golaha.

t) Marti sharafta lagu casuumay shirka golaha waxaa kareeban in ay hoolka shirka lasoogalaan waxyaabo aan munaasib ku ahayn haybada iyo karaamada golaha.

2. Qaabka fadhiga shirka:-

b). Nidaamka xubnaha golaha iyo Marti sharfta goluhu ay kala fadhiisanayaan waxaa go' aamin af-hayeenka.

**Qodobka 17aad.<u>Arrimaha kale ee Lagama Maarmaanka u ah Qabsoomida</u>**

**1.** Xafiisku waa inu xaqiijiyo dhamaystirka iyo habsami u diyaarinta waxyaabaha lagama maarmaanka u ah qabsoomida shirka.

2. Haddi ayna jirin sobob macquul ah oo lagu qanci karo xubin kasta oo golaha ka tirsani fasax la'aan shirka golaha Kama maqnaan karo.

3. Inta aanu shirku furmin waa in magacyada xubnaha golaha la yeedhiyo.

4. Haddii ayna dhamaystirnayn arimaha lagama maarmaanka u ah qabsoomida shirka, waa in waaxda ay khuseeyso ee xafiisku la socodsiiyo Af-hayeenka iyo cidaha kale.

5. Af-hayeenku wuxuu xubnaha golaha la socodsiinayaa ama ku wargalinayaa sobobaha keenay in shirku saacadii loogu talagay u furmi waayo.

**Qododbka 18aad** **<u>Bilaabida shirka Golaha</u>**

1. Marka la gaadho sacaada u shirku bilaabmayo waxaa xubnaha loogu baaqi in ay soo galaan hoolka shirarka islamarkaana kala fadhiistaan ku raasta loogu tala galay.
2. Xubnaha si loola socodsiiyo sacaada shirka islamarkaana u soo galaan hoolka shirka uguna fadhiistan meelaha loogu talagalay waxaa loo garaacayaa qalab cod-dheer oo lagula socodsiiyo in ay soo Galan shirka.
3. Xafiisku wuxuu xarunta shirarka ee golaha ku samayn koor (dawan) ay xubnuhu si fudud u maqli karaan.
4. Marka xubnaha goluhu ay fadhiistan waxyaabihii loo baahnaa oo dhan la dhamaaystiro, Af-hayeenka golaha oo ay horsocdaan cida u xfiisku u xilsaray goobta ku haboon fadhiisan.
5. Af-hayeenka goluhu kadib marka uu xaqiijiyo in ay wax waliba dhamaystiran yihiin ayuu dubaha miiska ku dhufan, dubhaas oo cadayn uu ah in shirku furmay.
6. Af-hayeenka goluhu wuxuu xaqiijin joogitaanka xubnaha kooramka /qabsoomida/ shirka loogu bahanyahay.
7. Kadib Marka la xaqiijinayo dhamaystirka koroomka shirku ku billaabmi karo Af-hayeenku wuxuu hab wafaaqsan xeerkan ku soo bandhigayaa ajandhayaasha shirka,

8. Si loo bilaabo doodaha lagu samaynayo ajandhaha la ansixiyay wuxuu Af-hayeenku golaha ku soo dhawaynayaa in xubinka ay khusayso oo arrinta golaha soo hordhigaya ama Af-hayeenka ayaa si toos ah u soo bandhigaya wixii isga khuseeya.

**Qodobka 19aad . <u>Hogaaminta Shirka Golaha</u>**

1. Shir kasta oo uu goluhu yeelanayo waxaa hoggaamin Af-hayeenka.
2. Iyadoo farqada 1aad ee Qodobkani ay jiran, marka Afhayeenku shirka ka maqan yahay waxaa hab wafaaqsan qodobka 10(2) ee xeerkan hoggaamin shirka golaha Af-hayeen ku-xigeenka.
3. Af-hayeenku marka uu ku gudo jiro hoggaaminta shirka, wuxuu fursadaha hadalka ugu qaybinayaa xubnaha si cad oo cadaali ah islamarkaana isku dheellitiran.
4. Xubin kasta oo fikirkiisa ku dhibaanayaa hab wafaaqsan hanaanka anshax ee xeerkani dhigayo Afhayeenku hadalka Kama joojin karo.
5. Af-hayeenku waa inuu mudnaanta hadalka siiyo xubnaha soo jeedinaya ama ka hadlaya qaab-socodka iyo ilaalinta nidaamka shirka.
6. Marka goluhu arin ajandhe ahaan isla qaatay si ballaadhan u falanqeeyo ugana doodo Af-hayeenku wuxuu suurto galinayaa in goluhu arrinta go’aan ka gaadho.
7. Af-hayeenku wuxuu isku dubarida iskuna habeeyaa fikiradaha iyo aarada kala duwan ee xubnahu ay ka bixiyaan ama ka soo jeediyaan mawduucyada shirka.

**Qodobka 20aad** **<u>Luuqada Shaqo ee golaha</u>**

1. Luuqada shaqo ee goluhu waa Af-soomaali, dood kastana waxay ku soconaysaa luuqada afka soomaaliga.
2. Xubnaha golaha iyo Marti sharaftaba marka ay rayigooda dhibanayaan goluhu wuxuu u hawlgalin adeega tujuman.
3. Xubinku wuxuu sixitaan ku sameeyn karaa marka khalad ka dhex dhashay turjumida iyo hadalka xubinka soo jeediyay waa in uu gacanta kor u taago ama adeegsada qalabka electronicada ah ee loogu tala galay oo Af-hayeenkuna u fasaxo.

**Qodobka 21aad** **<u>Minitka shirarka golaha</u>**

1. Minitka shirarka Golaha waa in si habsaami leh loo diyaariyaa.
2. Minitka shirarka Goluhu wuxuu ka koobnaan arimaha hoos ku xusan

   b) Saacada, maalinta iyo goobta shirka.

   t) Liiska magacayada ka soo qaybgalayaasha, meesha ay ka yimaadeen iyo xilaalkoodaba.

   j) Xubnaha Marti sharfta ah iyo nooca ay yihiin.

   x) Ajendhayaasha shirka.

   kh) Fikirada la codsaday in si gaar ah loogu diiwaangaliyo

   d) Go'aanka shirka ka soo baxay, mudada u socoday iyo xalaada shirku ku dhamaaday.
3. Minitka shir kasta waa in laga ansixiyo shirka xiga ee golaha ansixintaasna waa in Afhayeenka iyo ku-xigeenkuba saxeexan.
4. Xubin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu arko minitka shirka.

5 Hanaanka xafidada minityada iyo qoraalada waxaa lagu xeerin awaamiir.

6 Minityada waa in lagu xafido hanaan caasriyaa oo sahlayaa inay xubnuhu si fudud ku helan.

**Qodobka 22aad** **<u>Marti Sharafta Golaha</u>**

1. Masuuliyiinta xafiisyada dawladu marka ay arrimo ama warbixino xafiisyadooda khuseeya laga hadlayo waxay ka soo qayb gali karaan shirka.
2. Marti sharafta ama masuuliyiinta kale ee ka soo qayb gasha shirka waxaa looga baahan yahay in ay sharafta iyo karaamada golaha ilaaliyaan.
3. Hadii Marti sharafta ama masuuliyiinta kale ay ku dhaqmaan anshax daro, si ay isku saxan digniin ayaa la siin marka ay ka waantoobi wayaan Afhayeenku wuxuu amar ku bixinayaa in shirka laga saaro.

**Qodobka 23aad** **<u>Shaqaalaha Taakulaynta</u>**

1. Shaqaalaha adeeg bixinta ee shirka waa in ay hawshooda u gutaan si aan shirka wax u dhimaynin.
2. Shaqaalaha taakulayntu waa in ay xushmeeyaan sumcada iyo sharafta golaha.
3. Marka shaqaalaha taakulayntu ku sifoobo anshax daro culus, ganaaxa ku cad farqada 8aad ee Qodobka 25 ee xeerkan ka sokow , wuxuu af-hayeenku amar ku bixin karaa in xafiisku ka qaado tallaabo anshax oo wafaaqsan sharciga shaqaalaha dawlada.

**Qodobka 24aad** **Anshaxa Doodaha shirka**

1. Sida uu dhigayo qodobka 48(4) ee dastuurka xubin kasta oo golaha ka tirsani wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah fikirkiisa uga soo jeediyo shirarka golaha.
2. Arimaha farqada 1aad iyo Qodobada kale ee xeerkan lagu qeexay iyadoo la sugayo xubinka hadal soo jeedinaya wuxuu raacayaa anshaxa hadalka ee soo socda:-

b) Hadalkiisa waa in uu noqdo mid la xidhiidha ajandaha oo gaaban, hufan oo saacada loo fasaxay ku eg.

t) Fikirka ama dood la xidhiidha arin ka socota maxkamada oo aan go'aan laga gadhin looma soo gudbin karo golaha.

j) Waxaa reebaan in dood ku salaysan been abuur la soo hor dhigo golaha.

x) Hadalka la xidhiidha nabadgalyada deegaanka iyo shacabkaba waxyeelo ku keeni karta lama soo jeedin karo.

kh) Hadalku waa in ayna noqon kuwa wax u dhima sharafta iyo sumcada golaha, xubnaha, shaqsiyaal kale iyo hayadahaba.

d) Soo jeedinta fikrad ka soo horjeedka ama taageeridu waa in ayna noqonin mid wax u dhinta xuquuqda xubnaha kale golaha ama khilaaf abuuri karta islamarkaana geedi socodka wanaagsan ee shirka khalkhal ama jahawareer galisa.

r) Xubinku marka uu fikradiisa jeedinayo waa in aan lagu samaynin habab anshax darro ah oo ay ka mid yihiin guux, sacab, qaylo, iwm oo eena in uu xubinku joojiyo hadalkiisa.

s) Xubin kasta waa in uu ilaaliyo arrimaha golaha sir ahaan ugu yaala.

Sh) mudada shirku socodo, xubinku waa in aanu soo jeedin arrimo ka baxsan ajandaha sidoo kale, waxaa ka reeban furitaanka teleefoonka mobilka, cabista siggarka iwm.

Dh) Markasta oo uu af-hayeenka ama xubin kaleba hadlayo waxaa xubnaha kale ka reeban sheeko iyo kicitaan.

3. Xubinka raba inuu khudbad ama fikrad soo bandhigo waa inuu ku dhaqmo arimaha soo socda:-

b) Marka uu bilaabayo hadalka waa inuu ku bilaabo mudane Af-hayeen waad mahad san tahay.

t) Fikradaha golaha loo soo bandhigayo waa in ay noqdaan kuwo ku salaysan xurmo oo aan wax u dhimaynin sharafta cid kale gaar ahaan marka uu rabo inuu tilmaamo xubin kale ama mas'uul dawladeed, waana in uu raaciyo mudane ama marwo.

j) Marka xubinku ka hadlayo fikrad la xidhiidha xisbigiisa siyaasadeed waa in wakiilka xisbigiisu magaca xubinkaas uu soo gudbiya af-hayeenka.

x) Xubinka raba in fursad u ku hadlo la siiyo, waa inuu fasaxa gacan ku muujiyo lama ogola in uu isku dayo dhaqdhaqaaq kale oo aan waafaqasanayn nidaamka si uu ugu helo fursad uu ku hadlo.

Kh) Xubinka raba inuu sixitaan ku sameeyo xubin kale, hadalkiisa ku wajahan qaab socodka ama arin la xidhiidha nidaamka, waa inuu gacanta taago ama adeegsado qalabka electronickada ah ee loogu talo galay, fasaxna helo, isagoo hadalkiisa hal daqiiqo ku soo koobayaa.

d) Xubinka is mooda in codka la siiyay ama loo fasaxay Af-hayeenku inta uu ka joojiyo hadalka ayuu siin xubinka kale ee fursada hadalka la siiyay.

r) Xubin kasta oo golaha ka tirsan isagoo fikir soo jeedinaya marka uu afhayeenku hadalka ka joojiyo, waa inuu hadalka joojiyaa, qaatana amarka u Afhayeenku bixiyo.

s). Xubinka golaha u soo bandhiga fikir si looga doodo ka hor inta aan fikirkaas go'aan laga gaadhin xubinku wuu ka noqon karaa, doodiina way xidhmaysa, hase ahaatee haddii xubin kale codsado in arinta laga si dodo doodu way sii socon kartaa.

4. Sida kor ku cad su'aasha laga soo jeediyo hab socodka shirka lagama doodi karo. Hase ahaate af-hayeenku sharaxaad ama qeexis ku haboon ayuu su'aasha ka bixin karaa.

**Qodobka 25aad <u>Ilaalinta Nidaamka iyo Anshaxa Shirka</u>**

1. Af-hayeenku wuxuu yeelan awood uu ku sugo isalamarkaana fuliyo nidaamka iyo anshaxa shirka.
2. Marka lagu xad gudbo anshaxa iyo nidaamka hadalka ee lagu xeeriyay x/nidaameedkan waxaa la qaadi karaa talaabooyinkan soo socda:

b) Af-hayeenku hadalka ayuu ka joojin xubinka isagoo magac-dhabaya wuxuna siin digniin sixitaan ah.

t) Xubinka hadalka watay hadii uu qaato digniinta sixitaanka islamarkaana bixiyo raali galin hadalka uu sii wadan karaa.

j) Xubinka aan xushmayn digniinta sixitaanka ee la siiyo af-hayeenku wuxuu amri karaa in uu ka baxo shirka.

x) Xubinka ku dhaqma anshax xumo af-hayeenku wuxuu ka saari karaa shirka golaha xubinkana waxaa waajib ku ah inuu fuliyo islamarkaana sida ugu dhakhsaha badan uga baxo shirka golaha.

Kh) Xubinka lagu qaado amarada ku xusan xarfaha ''j'' iyo''x'' ee aan fulin af-hayeenku wuxuu amri karaa nidaam sugayaasha goluhu in ay xog ku saaraan.

d) Xubinka lagu fuliyo amarada ku xusan xarfaha 'j' iyo 'x' wuxuu af-hayeenku amri karaa in aanu ka qayb qaadan kalfadhiga golaha ee xiga.

r) Xubinka lagu fuliyay amarka ku xusan xarafka 'Kh' ee xooga lagu saaro wuxuu af-hayeenku ka xayiri karaa in aanu ka qayb qaadan labbo kalfadhi oo isku xiga islamarkaana qaban hawlaha golaha.

3. Marka khaladku noqdo mid culus ama mid si isdaba joog ah loo gaysto ra'yi go'aameedka uu af-hayeenku u soo dhaweeyo golaha ayuu goluhu go'aan ka soo saari karaa ama wuxuu goluhu u gudbin karaa arrinta gudiga joogtada ee arrimaha maamulka iyo sharciyada si uu u soo baadho oo uu uga keeno warbixin kadibna wuxuu qaadan go'aanka ku xusan qodobka 104 (7) ee xeer-nidaameedkan.

4. Xubin kasta oo ka tirsan golaha wuxuu mar kasta u soo jeedin karaa ra'yi go'aameed lagu fulinayo go'aanka golaha ee ku xusan qodob hoosaadka (3) ee qodobkan.

5. Marka dhibka nidaam xumadu tahay mid guud ahaan wiiqi kartaa habsami u socod siinta shirka maalinkaas ee golaha ama noqdo mid khilaaf wayn ka dhex aloosi karaa xubnaha golaha

ama ka abuuri karaa amaan daro ama af-hayeenku garwaaqsado in uu dhalin karo amaan daro wuxuu af-hayeenku joojin karaa shirka hadii uu lagama maarmaan u arkana wuxuu amri karaa xooga nidaam sugida goluhu in uu soo fara galiyo arrinta oo uu joojiyo.

6. Af-hayeenku shirka la joojiyay maalinkas hadii la sii wadi karo saacada uu go'aamiyo ayaa halkiisii laga sii wadan karaa iyadoo uu arrinta dhacday goluhu inta uu ka doodo go'aan ka soo saari doono ama muddo kale ayuu shirka u wareejin karaa.
7. Arrimaha ku xusan qodob hoosaadyada (2) iyo (3) ee qodobkan waxay dhaqan gal ku noqon xubnaha taageerada ka gaysta in aan la xurmayn amarada af-hayeenka ama ka qayb qaata khal-khalinta nidaamka shirka.
8. Cidda shirka golaha ka abuurtay anshax xumada ama nidaam xumada marka ay noqdaan Marti sharaf ama shaqaalaha taakulaynta ee golaha af-hayeenku wuxuu siin karaa digniin ama talaabooyinka kale ee ku haboon ayuu ka qaadi karaa.

## <u>Qaybta Afraad</u>

## <u>Soo Bandhiigida Ajandayaasha iyo Sargo'ynta Wakhtiga</u>

### Qodobka 26aad. <u>Curinta Ajandayaasha</u>

Ajandayaasha u goluhu ka wada xajoonayo waxaa soo curin karaa;

1. Golaha hawl-fulinta ee deegaanka.
2. Af-hayeenka
3. Guddiyada

4. Xubnaha golaha
5. Xisbiyada golaha ku leh toban kursi iyo wixii ka sareeya

**Qodobka 27aad** **<u>Jango'ynta Ajandayaasha</u>**

1. Ajande kasta oo uu goluhu ka wada xajoonayo waxaa soo bandhigi gudiga xidhiidhinta.
2. Gudiga xidhiidhintu ajandayaasha in laga doodo uu u soo bandhigayo waxay u dhigi hanaanka ay u kala horeeyaan islamarkaana waxay u cayimi wakhtiga laga doodayo.
3. Had iyo jeer ajandayaasha golaha hawfulinta deegaanka inta mudnaan la siiyo ayaa laga doodi.
4. Ajandaha maalinta iyo wakhtiga dooda ee loo qoondeeyay afhayeenku wuxuu xubnaha golaha la socodsiin 48 saacadood ka hor saacada shirku bilaabmayo.
5. Ajandaha qabyada ah waa in 15 maalmood ka hor qabashada shirka golaha iyadoo loo sii marinayo afhayeenka loo gudbiyo gudiga xidhiidhinta.
6. Iyadoo ay jirto arinta ku cad farqada 5aad ee qodobkan arimaha ay soo curiyeyaasha ajanduhu ay u arkaan in ay deg-deg yihiin waa in la soo gudbiyo sadex maalmood ka hor maalinta shirka golaha.hase ahaatee hayada fulintu waxay keeni karta maalin ka hor maalinta shirka goluhu qabsoomayo.
7. Hadaan goluhu jiho kale u dhigin mooyee, ajandaha uu goluhu diiday isla sanadkaas dib looguma soo celin karo.
8. Go-aanada gudiga xidhiidhinta waxaa lagu meel-marin cod hal dheeri ah (50%+1).

**Qodobka 28aad** **<u>Qondaynta Wakhtiga Hadalka</u>**

1. Arrin kasta oo ajande ahaan in looga hadlo loo soo dhigo, waa in muddada dooda ee ay qaadanayso loo cayimo.

**2.** Goluhu marka uu ka wada hadlayo arimaha kala gedisan waa in loo raaco habka isticmaalka wakhtiga ee soo socda**.**

b) Doodaha laga samaynayo akhriska sharciyada golaha la hor keeno, goluhu wuxuu cayima muddada ay dooda arrintaasi socon karto.

t) Warbixinta ama ra'yi go'aameedka la soo jeedinayo iyadoo lagu xisaabtamayo baaxada ay leedahay ayaa wakhtiga ku haboon loo qoondeyn.

j) Sida ku cad xarafka "t" iyadoo ay sideeda tahay warbixinta wax-qabadka dawlada ee uu soo jeedinayo madaxwaynaha deegaanku looma cayimayo mudo go'an oo uu ku dhamaystiro.Hase ahaate, dooda laga yeelanayo waxaa loo cayimi wakhti go'an.

x) Dooda ajandaha miisaaniyad sannadeedka ee deegaanka waxaa loo cayimi wakhti ku filan.

3. Arrimaha kale ee la soo bandhigaayo waxaa loo cayimi wakhti ku filan iyadoo lagu xisaabtamayo baaxada iyo ahmiyada arrinta.
4. Wakhtiga la siinayo jawaabaha iyo faafaahinta laga bixinayo su'aalaha iyo fikiradaha laga soo jeediyo ajandaha laga doodayo waxaa laga dhax qoondayn wakhtiga guud ee ajandaha loo cayimay.

5. Habka isticmaalka wakhtiga hadalka ee lagu cayimayo hab wafaaqsan Qodobkan sida loo adeegsanayo waxaa hirgalin af-hayeenka.

**Qodobka 29aad <u>Saacadaha Hadalka</u>**

1. Hab waafaqsan Qodobka 28aad wakhtiga lagu qoondeeyay meelmarintiisa waxa hagi afhayenka.
2. Gudoomiyayaasha ama wakiilada axsaabta su'aalaha iyo fikiradaha ay soo bandhigayaan ayaa la siinayaa mudnaanta hore waxana ku xigi xubnaha kale ee golaha.
3. Wakhtiga gudoomiyayaasha asxaabtu su'aal ama jawaab ay ku bixinayan looma cayimayo.
4. Xubnaha aan wakhtiga loo ogolaaday ku isticmaalin sababo ka baxsan iyaga, Afhayeenku wuxuu siinayaa fursad ay wakhtigooda ku dhamaystan.
5. Mudada hadalka ee lagu cayimay farqada 1aad ee Qodobkan waxba uma dhimayo arrimaha hoos ku xusan;

b) Hay'ad ama shaqsi loogu baaqay inuu warbixin ama markhaati bixiyo.

t) Faahfaahinta uu bixiyo af-hayeenku.

j) Hay'adaha kala duwan warbixinta ay u soo jeediyaan golaha.

6. Dhammaan xubnaha si loo gadhsiiyo fursadaha hadalka xubinku arinka uu hal mar ka hadlo mar labad fursad looma siin karo inuu ka hadlo isla arimahas.
7. Afhayeenku wuxuu ogaysiinayaa xubinka saacada hadalku ka dhamaanayo, wuxuuna u adeegsan shaqaalaha adeega ama

makarafoonka gacanta ama qalabka wax sheega. Xubinkuna waa inuu joojiyo hadalka marka u dhamaado wakhtiga loogu talagalay.

8. Iyadoo arrimaha lagu cayimay qaybtani ay jiran:-

b). Hadii Afhayeenku u uu arko in arinta shaqsigu ka hadlayo ay tahay mid muhiim ah wuxuu ugu kordhin karaa wakhti aan ka badnayn 10 daqiiqo oo kale.

t) Afhayeenku hadii u uu arko in arinta laga sii doodo wakhti dheeraad ah ayuu fursado hadal u bixin karaa.

j) Xubinku marka uu arrin uu ka hadlay sixitaan ku samaynayo, Afhayeenku wuxuu siin karaa fursad uu ku hadlo**.**

**Qodobka 30aad** **Mooshinada (motion)**

1. Mooshin waxaa loola jeedaa fikir uu golaha hawl fulinta ee deegaanku ama xubnuhu ama xisbiyadu u soo bandhigaan si goluhu dood uga yeesho ama u ka doodo go-aanna ka bixiyo.
2. Mooshin kasta oo golaha loo soo bandhigayo hanaanka loo racayo waxaa xeerin awaamiir.

## Qaybta Shanad

## Hanaanka Go'aan Bixinta

**Qodobka 31aad** **Siyaabaha Loo Soo bandhigo Arrimaha Go'aan u Bahan**

Si goluhu u helo fikir laga duulo wuxuu raci karaa tabaha hoos ku cad;

1. Isaago amrayaa in hay'adaha ay khuseeyso in ay u soo gudbiyaan cadaymaha iskugu jira maqal, qoraal ama muuqal.
2. Isagoo sahlayaa in arrinta ay soo baadhan guddiyo kala geedi-san.
3. Arrimaha ku cad qodobkan iyadoo guddiyada lagu salaynayo ayaa lagu dhaqangalin.

**Qodobka 32aad** **Go'aan Qaadashada Golaha**

1. Ajande kasta marka si fiican loo gorfeeyo, Afhayeenku wuxuu soo jeedin in go'aan laga qaato.

2. Afhayeenku marku ogaado in arrinta si fiican loo gorfeeyey, wuxuu faahfaahin ka bixinayaa jihada go'aan qaadashada iyo qaabka loo codaynayo.

3. Hab wafaaqsan qododka 55(2) ee dastuurka goluhu wuxuu ku go'aan qadan cod aqlabiyad ah.

4. Iyadoo aan la dhawrayn arrimaha ku cad farqada 3aad ee qodobkan arimaha hoos ku xusan waxay u bahan yihiin taageero codeed oo gaar ah.

b) Marka la soo bandhigo fikir dib u habeeyn dastuurka ee ku cad qodobka 108 ee dastuurka.

t) Wax ka bedelka dastuurka ee ku cad qodobka 109(2) ee dastuurka.

j) Kordhiinta xilliga bayaanka xalaada deg-dega ee ku cad qodobka 105(3) ee dastuurka.

5. Cod bixinta iyo tirintuba waxay u dhacayaan sidan;

b) Gacan taga ama cod bixin qarsoodi ah hadba sida ay xaaladu tahay

t) Cod bixinta waxaa tirin shaqaalaha afhayeenku u xil saro.

j) Marka codka la tiriyay uu isl'eg noqdo waxaa la qaadan dhinaca uu Afhayeenku u codeeyo.

x) Arrimaha codka loo qaadayo hadii loo baahdo in si gaar gaar ah loogu kala codeeyo inta loogu codeeyo ayaa ugu danbaynta si guud ajandaha loogu codayn loona ansixin.

6. Arimaha go'aanka laga qaatay inta taariikh iyo tirsi la siiyo ayaa la diwaan galin Lana xafidi.

**Qodobka 33aad Dib u Dhigida go'aan**

1. Arimaha laga hadlayo waxaa ka go'aan qaadashadooda dib loogu dhigi karaa sobobaha soo socda:-

b). Marka la isla qaato ama la codsado in ajeendaha gorfayn dheeri ah u bahanyahay.

t) Marka kooramka shirku ku bilaabmay u yahay mid aan buuxin Karin tirada loogu baahan yahay go'aan qaadashada.

j) Marka arrimaha ku xusan Qodobka 25aad farqada 5aad ee xeerkani ay dhacaan.

x). Marka aan la keenin caddaymaha loogu baahna in go'aan lagu qaato.

kh).Marka anshax daro dhacday awgeed u goluhu go'aamiyo in shirka la xidho.

d) Marka ajandaha laga wada hadlayo oo doodiisu dhamaanin ay soo baxdo xaalada deg-deg ah oo ay lagama maarmaan tahay in goluhu ka wada hadlo.

2. Arrimaha qodobkan waxaa lagu dhaqangalin guddiyada.

**Qodobka 34aad Dib u Eegista Go'aanada golaha**

1. Arrin goluhu go'aan ka gaadhay dib looguma soo celin karo.
2. Ka sokoow aarimaha ku cad farqada 1aad ee qodobkan xalaadaha hoos ku cad ayaa dib loogu eegi karaa.

b) Marka dhaliilo jiray wakhtigii go'aanka hadii sixitaan lagu sameeyay ama go'aanku uu yahay mid aan la fulin Karin

t). go'aanka la gaadhay haddi u yahay mid khaladad sharci oo asaasi ah laha islamarkaana la soo saxay.

j). Marka golaha maamulka deegaanku dalbado inu arrinta sharaaxad ka bixiyo.

3. Arrimaha lagu xusay kor waxaa sidoo kale lagu dhaqangalin (adeegsan) guddiyada.

## **Qaybta lixaad**

## **Hanaanka Sharci Dejinta**

### **Qodobka 35aad Soo Saarista Sharcigu Arrimaha U Ka Koobanyahay**

Soo saarista sharci waxay ka kooban tahay arrimahani;

1. Soo saarista sharci cusub
2. Waxka bedelka ama burinta sharci hore
3. Ansixinta heeshiisyada lala galo deegaanada kale

### **Qodobka 36aad Soo Curinta Sharci**

1. Hawsha ugu badan ee Soo curinta sharci waxa yeelan ha'yada hawlfulinta ee maamulka deegaanka.
2. Iyadoo ay jirtan arinta ku cad farqada 1aad ee qodobkan, qaybaha hoos ku cad waxay awood u leeyihiin inay soo curiyan sharci;

b). xubnaha golaha

t). guddiyada

j). xisbiyada golaha ku leh toban kursi iyo wixii ka sareeyaa

x). ururada bulsho ee heer deegaan ka dhisan

kh). Hay'adaha kale ee sharcigu siiyay awooda soo curin sharci

3. Iyadoo an la dhawrayn arrimaha ku cad farqada 2aad ee qodobkan awooda soo curinta bayaan (sharci) maaliyadeed

iyo arimaha la xidhiidha nabadgalyada deegaanka waxaa iska leh dawlada oo kaliyaa.

4. Sharciga qabyada ee hab wafaaqsan farqada 2aad (b) ee qodobkan lagu soo curinayo oo qoraal ah islamarkaana u xubinku soo saxeexay waa in af-hayeenka loo soo gudbiyo.
5. Sharciga qabyada ee hab wafaaqsan farqada 2aad (t) ee qodobkan lagu soo curinayo inta gudoomiyaha guddigu u soo saxeexo waa in af-hayeenka loo soo gudbiyo.
6. Sharciga qabyada ee hab wafaaqsan farqada 2aad (x) ee qodobkan lagu soo curinayo inta u gudoomiyaha ururku soo saxeexo waa in af-hayeenka loo soo gudbiyo.
7. Sharciga qabyada ee hab wafaaqsan farqada 2aad (x) iyo (kh) ee qodobkan lagu soo curinayo waa in masuulka sare ee hay'du u soo saxeexo una soo gudbiyo af-hayeenka.
8. Sharciga qabyada ee hab wafaaqsan farqada 2aad (j) ee qodobkan lagu soo curinayo waa in lagu soo kabo saxeexa hogaamiyaha ururka.
9. Sharciga qabyada ee loo soo dhaweeynayo goluhu waa inu la socodo arimahan;

    b) Ahmiyada sharcigan qabyada ah.

    t) Dulucda qormada oo faah-faahsan

j) Ansixinta sharcigani fa'idooyinka u uu leeyahay dhinacayada maamul, horumaarineed iyo bulshoba.

x). haddi sharciga la dhaqangaliyo sameeynta miisaaniyadeed ee u dawlada ku yeelanayo.

10. Sharci kasta oo golaha loo soo gudbinayaa waa in u ku diyaarsanado luuqada Af-soomaaliga.

**Qodobka 37aad** **<u>Akhriska Meertada ee Shuruucda Qabyada ah</u>**

1. Akhrinta dulucda sharci kasta oo qabyo ah waa in uu maro saddex meerto si loo ansixiyo.
2. Akhriska meertada koowaad waxay uu dhacaysa habkan hoos ku cad;

b) af-hayeenku into bayaanka sumad siiyo ayuu guddiga u xilsaari karaa ama inta ajeendaha lagu daro ayuu golaha toos u hor keeni, iyadoo dulucda iyo Qodobada sharcigan qabyada ah ee la soo gudbiyay u golaha u akhriyaya Afhayeenka ama wakiilka haya'ada sharciga qabyada ah soo gudbisay.

t) Hadii qormaada sharciga qabyada ah uu yahay mid badan oo akhrintiisu wakhti qadanayo afhayeenku into hore guddi farsamo ugu gudbiyo ayuu goluhu si toosa uga doodaya iyadaan af-hayeenku si toosa golaha ugu akhriyiin.

j). Dooda laga yeeshay sharcigan qabyada ah marka ay dhamaato afhayeenku wuxuu siinayaa sumad kadibna wuxuu u gudbinayaa guddiga ay khusayso.

3. Meertada 2aad wixii talo iyo faahfaahin ah ee ay ka soo diyaariyeen gudigii ay khusaysay ee loo gudbiyay in ay golaha u soo gudbiyaan ayuu afhayeenku suurto galinayaa.

b) Meertada Akhriska 1aad wixii talo iyo faahfaahin ah ee ay ka soo diyaariyeen gudigii ay khusaysay ee loo gudbiyay in ay golaha u soo gudbiyaan ayuu afhayeenku suurto galinayaa.

t) Afhayeenku wuxuu sida ku cad xararfka ee sare fursad golaha uu siin in laga doodo warbixinta iyo talabooyinka ay gudigu soo bandhigeen.

j) Dooda kadib goluhu go'aan ayuu ka qaadan hadii go'aan laga gaadhi waayo guddiga ayaa dib loogu ceelin.

4. Meertada Akhriska 2aad ee sharciyada la soo bandhigayo waxay marayaan habkan;

b) Sida ku cad farqada 3aad(j) ee Qodobkan gudiga dib loogu ceeliyay dib u habaynta ay ku soo sameeyeen iyo talo bixinta go'aan qaadasho ayay golaha u soo bandhigayaan .

t) Ugu danbeyna goluhu marka uu si balaadhan uga wada doodo wuxuu qaadan go'aan dhaqangal ah.

**Qodobka 38aad:-** **u Cod Qaadista Sharciga**

Goluhu marka uu ansixinayo sharci Qodob Qodob ayuu u go'aamin ugu danbaynta si guud ayuu u wada ansixin sharcigaas.

**Qodobka 39aad:-** **Mudada Falanqaynta Sharciga Qabyada**

1. Hadaan golahu u arag arin dag-dag ah, sharci kasta oo qabyo ah in gudiga loo xilsaaray ay arinta soo darsaan islamarkaana ay golaha raci- go'aameed u soo dhaweeyn waa in ugu yaran 10 maalmood la siiyo.
2. Ka sokow arinta ku cad farqada 1aad ee qodobkan iyadoo lagu xisaabtamayo baaxada & culayska qormada sharci af-hayeenku wuxuu ugu dari karaa wakhti dheeraad ah.

**Qodobka 40aad:-** **Sharciga La Ansixiyay oo Saxeex loo diro**

1. Af-hayeenku sharciga uu goluhu ka dooday ee uu isla qaatay madaxwaynaha ayuu si uu u saxeexo u gudbin.
2. Madaxwaynuhu sharciga hab wafaqsan firqada 1aad ee qodobkan loogu soo gudbiyay waa in ku saxeexo 15 maalmood gudahood oo af-hayeenka dib ugu soo celiyo. Madaxwaynuhu hadii uu mudadan loo cayimay ku saxeexi waayo sharcigu wuu dhaqan galayaa.
3. Sharciga inta aan lagu soo daabacin dhool Gazeta-ka hor af-hayeenku wuxuu samayn karaa wixii sixitaan farsamo ah ee loo bahan yahay.

**Qodobka 41aad** **<u>Daabacaada Sharci</u>**

1. Sharciyada ay goluhu ansixiyeen Af-hayeenku wuxuu ku soo saari dhool Gazeetaha deegaanka
2. Goluhu wuxuu yeelan madbacaad u gaar ah oo uu shuruucda ku daabaco, hadii ay arrintani suurta gal ahayn waxaa laga soo daabaci madbacadaha kale.
3. Sharciga la soo daabacayo marka uu u bahan yahay in si deg deg ah loo soo daabaco af-hayeenku cida daabacaysa wuxuu siin amar si mudnaanta loo siiyo daabacaada sharcigaas.
4. Sharci kasta oo goluhu ansixiyo inta nuqulada soomaaliga, amxaariga iyo ingiriisiga la dhamaystiro ayaa madbacada loo diri.
5. Xafiisku wuxuu daba gali turjumista iyo daabacaada shuruucda.

**Qodobka 42aad** **<u>Baahinta Shuruucda</u>**

1. Shuruucda uu goluhu soo saaray waxaa loo baahin hay'adaha fulinta ee ay khusayso.
2. Shuruucda uu goluhu soo saaray in si habsami leh loo baahiyay gudiga ay khusayso ayaa daba gal iyo la socod joogta ah ku samayn.

**Qodobka 43aad**:- **<u>Xafidada Liistada Sharci yada</u>**

Goluhu wuxuu xafidi liistada shuruucda u sanadkasta soo saaro islamarkaana wuxuu la socodsiin qaybaha ay khuseeyso.

**Qodobka 44aad** :- **<u>X/Nidaameedka Ay Ha'da Fulintu Soo Saarto</u>**

1. Hab wafaaqsan wakiilashada goluhu uu siiyo hay'ada fulinta ee deegaanku waxay soo saari kartaa x/nidaameed.
2. X/nidaameedyada uu golaha hawl fulinta deegaanku soo saaro si loogu soo saaro dhool Gazeeta waa in loo gudbiyo golaha (Af-hayeenka)
3. X/nidaameedka hay'ada fulintu ansixisay inta aan lagu soo daabacin dhool Gazeeta ka hor af-hayeenku wuxuu ku samayn karaa wixii sixitaan farsamo ee loo bahan yahay
4. Hawlaha daabacaada iyo baahinta x/nidaameedyada waxaa dhaqan gal ku ah arrimaha ku cad qodobada 41 iyo 42 ee xeerkan.

**Qodobka 45aad:**- **<u>Go'aanada (Resolution)</u>**

Goluhu wuxuu qaadan karaa noocyada go'aan ee hoos ku cad:-

1. Go'aan aan khasab ahayn oo uu goluhu ku muujinayo aragtidiisa ku aadan arrin
2. Go'aan uu goluhu ka soo saaro fulin arrin, in aan la fulin, go'aan qaadasho ama aan go'aan laga qaadan oo qof ama hay'ad kasta dhaqan gal ku ah
3. Go'aan uu goluhu ka soo saaray hanaankiisa shaqo ee u gaarka ah oo dhaqan galkiisuna ku eg yahay hanaankiisa shaqo oo kaliya.

## Qaybta Todobaad

## Hanaanka Ansixinta Miisaaniyada

**Qodobka 46aad:- Soo Bandhigida Miisaaniyada**

1. Hab wafaqsan qodobka 59(3) ee dastuurka ayuu golaha hawl fulinta ee deegaanku ku soo diyaariyaa miisaaniyada kutalagalka ee dawlada deegaanka una soo gudbin golaha.
2. Hadii aysan jirin xalad xaasaasi ah qormada ku talagalka miisaaniyada oo qaab duuduub ah iyo faah faahsanba loo soo diyaariyay waa in dhamaadka sannad miisaaniyeedka bil ka hor golaha loo soo gudbiyo.

**Qodobka 47aad Soo Jeedinta Iyo Falanqaynta Miisaaniyada**

1. Miisaaniyada ku talagalka ah ee deegaanka inta aan golaha loo gudbin ka hor iyadoo loo sii marinayo af-hayeenka waa in loo bandhigo gudiga joogtada ah ee miisaaniyada iyo hanti dhawrka.
2. Kadib marka miisaaniyada ku talagalka ah loo gudbiyo gudiga joogtada ah ee miisaaniyada iyo hanti dhawrka saacada iyo maalinta ay gudigu go'aamiyaan waa in madaxa xafiiska maaliyada iyo horumarinta dhaqaaluhu uu miisaaniyada ku talagalka ah ee la soo bandhigay uu gudiga joogtada ah u soo jeediyo islamarkaana u falanqeeyo (budget speech) kadibna laga doodo.

**Qodobka 48aad wakhtiga dooda**

1. Af-hayeenku miisaaniiyada ku talagalka ah ee loo soo gudbiyay wuxuu u qoondayn wakhti ku filan oo lagu sameeyo falanqayn iyo eegis qoto dheer

2. Wakhtiga loo qoondaynayo dooda lagu falanqaynayo miisaaniyadu waa in ayna ka yaraan maalin.

**Qodobka 49aad:-** **<u>Ansixinta Miisaaniyada</u>**

Ka dib marka la soo afjaro dooda miisaaniyada iyadoo laga ambaqaadayo warbixinta iyo ra'yi go'aameedka ay soo diyaariyaan gudiga joogtada ah ee loo xil saaray falanqaynta miisaaniyada ayuu goluhu ka doodi islamarkaana u codayn.

## Qaybta Sideedad

## Nidaamka Kormeerka Iyo Dabagalka

**Qodobka 50aad Ujeedooyinka Dabagalka iyo koormeerka**

1. Ujeedada dababalka iyo koormeerku waa hubinta habsami u fulinta miisaaniyada iyo hantida dawlada iyo shacabka
2. In hab shaqeedka dawlada loo fuliyay hanaan wafaaqsan sharciga iyo nidaamka.
3. In siyaasadaha, istratiijiyada, qorshayaasha, sharciyada iyo hab dhaqanka shaqo ee heer deegaan iyo kuwa heer feederaalba loo fuliyay hanaan (jiho) bulshada deegaanka gaadhsiin karaa horumaar wara.
4. Jiritaanka jihooyin horumar oo cadaali ah islamarkaana deg deg ah.
5. Taabagalinta dimuqraadiyada iyo maamulka suuban.
6. In xuquuqaha, amaanka iyo xasiloonida muwaadiniinta deegaanka la sugay.

7. In la xaqijiyo jiritaanka hanaan shaqo oo isku dubaridan oo ka dhexeeya hay'adaha dawlada.

**Qodobka 51aad** **<u>Hay'adaha Koormeerka Iyo Dabagalka Lagu Sameeynayo</u>**

1. Hay'adaha dawliga ah ee deegaanka iyo
2. Xafiiska golaha (kuwa gudaha)

**Qodobka 52aad** **<u>Tabaha iyo jahooyinka dabagalka</u>**

Goluhu koormeer iyo dabagal u ku samaynayo hay'ddaha dawligaah wuxuu raaci tabaha hoos ku cad ;

1. Ugu yaraan sanadkiiba mar ayaa si toos ah (foolka fool) waa in hay'adaha dawligu warbixin ugu soo ban dhigan golaha ama gudiga joogtada ah ee ay khusayso.
2. Marka goluhu lagama maar maan u arko wuxuu amar ku bixin in hay'adaha dawliga ah lagu sameeyo baadhis xisaabeed.
3. Marka goluhu muhiim u arko wuxuu arrimaha baadhitaanka ku xaqiijin isagoo adeegsanaya hay'adaha, maragyo, xirfadlayaal ama dhokumeentiyo

4. Goluhu isaga oo ka ambaqaadaya warbixinaha, xogaha iyo cabashooyinka uu ka helo hay'adaha dawliga ah, gudiyada iyo sidoo kale, bulshada iyo hay'adaha aan dawliga ahayn ayuu koormeer iyo dabagal sameyn.
5. Goluhu geedi socodka koormeerka iyo dabagalka ee uu ku sameeyay hay'adaha dawliga ah wuxuu dhibaatooyinka uu ku arkay xalintooda u qaadan jihooyinkan soo socda:-

b) Haddi khaladka dhacay uu yahay mid aasaaskiisu yahay dhinaca sharciga, wuxuu suurto galinayaa in sharci cusub oo arimaha lagu xakamaynayo la soo saaro.

t) Hadii ay golaha u cadaato in dhibaatada lagu arkay hay'ada dawliga ah yahay mid la xidhiidha miisaaniyada wuxuu qaadayaa talaabooyinka sixitaan ee loo baahan yahay.

j) Wuxuu dhibaatada la socodsiin xafiiska islamarkaana awaamiir ku siin in la saxo god daloolooyinka lagu arkay iyadoo dabagal lagu samaynayo sixitaanka khaladadkas.

x) Dhaliisha lagu arkay xafiiska hadii uu sixi waayo dhibaataduna tahay mid aas-aasi ah waxaa lala socod siin madaxwaynaha in uu talaabo ka qaado cidda mas'uulka ka ah dhibaatada iyadoo fulinteedana lagu daba galayo.

kh) Cidda dhibaatada abuurtay hadii ay tahay hay'adaha dawliga ah ee si toos ah u hoos taga golaha, waxaa uu goluhu ka qaadi talaabada ku haboon.

6. Goluhu marka uu dabaglka ku samaynayo hay'adaha dawliga ah si gaar ah uma faragalinayo hawl maalmeedka hay'adaas.
7. Goluhu hanaanka geedi socodka daba galka iyo koormeerka ee uu ku samaynayo hay'adaha dawliga ah waa in uu dhowro

madax bannaanida islamarkaana uusan fara galin gudashada waajibaadkooda shaqo

**Qodobka 53aad** **<u>Warbixinada Toos Loogu Soo Gudbinayo Golaha.</u>**

1. Hab wafaaqsan qodobka 49(3)(x) ee dastuurka ayuu markasta oo uu lagama maarmaan u arko uu mas'uuliyiinta hay'adaha dawlada su'aalo waydiin ugu yeedha islamarkaana hanaankooda shaqo baadhaa.
2. Wuxuu dhagaystaa islamarkaana ansixiyaa qorshe sannadeedka dawlada ee uu soo bandhigo madaxwaynuhu.
3. Hab wafaaqsan jadwalka shaqo ee uu madaxwaynuhu loo qabto ayuu sannadkiiba labbo jeer warbixin ku saabsan waxqabadka guud ee dawlada u soo bandhigi golaha. Hase ahaate, markastoo lagama maar maan loo arko in ay jiraan arrimo keenaaya in madaxwaynuhu golaha hor yimaado oo u ka warbixiyo wuxuu soo bandhigi karaa warbixin.
4. Goluhu ama af-hayeenku wuxuu hay'ad kasta oo dawladeed ku amri karaa in ay si toos ah golaha ugu soo dhaweeyso warbixin.
5. Waxaa golaha warbixin toos ah loogu soo dhawayn marka;

b) Marka ay lagama maarmaan tahay in hay'ada dawliga ahi golaha u sharaxdo tafaasiirta duruufaha xaasaasiga ah ee taagan.

t) Marka hayadaas dawliga ah warbixinada ay u soo gudbiyeen gudiga ama geedi socodka baadhis iyo koormeer ee gudigu ku helo dhibaato aas aasi ah.

J) Marka hay'ada su'aalo xaasaasi ah oo la xidhiidha shaqadeeda bulshadu ay marar badan ka soo jeediyaan.

x) Marka xubnaha goluhu ay su'aalo joogta ah oo hay'ada ku saabsan ay soo jeediyaan.

Kh) Warbixinaha hay'adaha dawliga ah ee uu sharcigu dhigaayo in ay golaha warbixin toos ah ugu soo bandhigaan.

**Qodobka 54aad** **<u>Hanaanka soo Bandhigida Warbixinta</u>**

1. Warbixinta loo soo bandhigayo golaha waxaa soo jeedinaya mas'uulka sare ee hay'ada oo ay wehelinayaan khabiirada shaqo ee xafiiska,
2. Iyadoo waxba loo dhimayn arrimaha ku cad farqada 1aad ee Qodobkan, marka masuulka sare ee xafiisku uusan warbixinta soo jeedin Karin sababo maan gal ah awgood waxaa warbixinta golaha u soo jeedin ku xigeenkiisa ama cidda uu wakhiishay.
3. Marka warbixinta xafiiska loogu soo gudbinayo hab wafaaqsan farqada 2aad ee Qodobkan, waa in marka hore mas'uulku sababta la socodsiiyo af-hayeenka.
4. Afhayeenku sida ku cad farqada 3aad ee Qodobkan arrimaha lagu soo cadeeyey haddii uu u arko maan-gal wuxuu amrayaa in warbixinta lagu soo jeediyo hab wafaaqsan farqada 2aad ee qodobkan.

**Qodobka 55aad** **<u>Hanaanka Loogu yeedho soo Jeediyaha Warbixinta</u>**

1. Sida ku cad Qodobka 53[aad] iyo 54[aad] ee xeerkan hay'adaha warbixinta u soo bandhigaya golaha wuxuu afhayeenku ku wargalin qoraal.
2. Af-hayeenku waa in uu bil ka hor ku wargaliyo maalinta ay warbixinta soo jeedinayaan.
3. Marka wakhtiga soo jeedinta warbixintu ayna munaasab ahayn ee ay hay'ada soo jeedinaysa codsato af-hayeenkuna ku qanco waa la badali karaa.
4. Xafiiska soo jeedinaya warbixinta waa inuu af-hayeenka u soo gudbiyo maalin ka hor cidda warbixinta soo jeedinaysa iyo khabiirada ku wehelinayaba.

**Qodobka 56[aad] <u>Dulucda Warbixinta iyo wakhtiga la soo gudbinayo</u>**

1. Warbixintu iyadoo ay ku wajahan tahay hawlaha shaqo ee cadiga ah waa in ay xambaarsanato;

b). Qorshe sanadeedka iyo hawlaha qabsoomay

t) Isticmaalka miisaaniyada

j) Maamulka cududa shaqaale

x) Natiijooyinka la gaadhay

kh) Dhibaatooyinka ugu wayn ee lala kulmay iyo tallaabooyinka xalka ah ee la qaaday

d) Arrimaha ahmiyada mudan iyo wixii la halmaala oo uu soo saxeexay mas'uulka sare ee xafiisku.

2. Marka warbixinta laga soo gudbinayo arrin u goluhu rabo in warbixin laga siiyo

waa in warbixinta loo soo dhigo hanaan guud oo muuqal ka bixinayaa arinta la rabay.

3. Warbixinaha lagu tilmamay farqada 1aad iyo 2aad intan golaha loo soo bandhigin 10 maalmood ka hor waa in Af-hayeenka la gaadhsiiyo.

**Qodobka 57aad Qorshaha U Goluhu Ku Dhegaysanayo Warbixinta**

1. Goluhu waa inu si dejisto qorshe uu ku dhagaysanayo warbixinta.
2. Goluhu qorshaha dheegaysiga warbixin ee u diyaarsanayo waa in ay ahaato hanaan uu sahlaya gudashada wajibaadka saran.

**Qodobka 58aad Borotakoolka Iyo Anshaxa Guud Ee Soo Jeediyaha Warbixinta**

1. Cid kasta oo golaha warbixin u soo jeedinaysa waa in ay lahaato anshaxa iyo borotakoolka ku haboon sharafta iyo karmada golaha.
2. Iyadoo aan waxba loo dhimin arimaha ku cad Qodobada xeerkan masuul kasta oo golaha warbixin u soo jeedinayaa waxa lagu hagi nidaamkan anshax ee soo socda:-

b. meesh loogu talagay marka u ka soo galo xarunta xafiiska golaha ayuu xafiisku fadhisin goobta loo diyaariayay.

t. labiiskiisu waa inu ahaado mid u dhigma sharafta golaha.

j Wixii ka baxsan waxyaabaha u ugu baahan yahay soo jeedinta warbixinta ma soo qaadan karo.

x. hoolka shirarka ee golaha cabista sigaarka iyo ficilada kale ee aan munaasabka ahayn ma samayn karo.

3. Xafiiska goluhu waa inu fuliyo arimaha hoos ku cad;

b soo jeediyaha warbixin ee golaha imanayaa Waa in ay diyaar u ahaadaan islamarkaana si haboon u qabilan.

t waa in ay imanshaha soo jeediyaha warbixinta ay Afhayeenka la socodsiiyaan islamarkaana u fuliyo amarka u bixiyo .

j marka ay Saacada shirku gaadho waa in ay xubnaha soo jeedinaya warbixinta ay qolka shir uu galiyo islamarkaana goobta loogu talagalay fadhiisiyo.

x. waa in ay si habsami leh u sabootiyan kadib marka ay warbixinta soo jeediyaan

**Qodobka 59aad <u>Hanaanka Dooda Warbixinta La Soo Bandhigay</u>**

1. Afhayeenku inta u ku soo dhaweeyo gudoomiyaha guddiga ay khuseeyso oo u soo jeediyaha isbaro ayuu inu soo jeediyo warbixinta lagu soo dhaweeyn.
2. Soo jeediyaha warbixintu wuxuu akhriyi ama hab sharaxad ah u soo dhigii qormada warbixineed la soo diyaariyay.
3. Kadib marka warbixinta la dheegaysto gudiga ay khuseeysa waxay soo bandhigii su'aalaha iyo fikradaha ay ka qaban warbixinta.
4. Kadib marka su'aalaha iyo fikradaha xubnaha guddiga laga jawabo waxaa loo gudbi soo jeedinta su'aalaha wakiilada xisbi iyo xubnaha kale.
5. Af-hayeenku wuxuu xubnaha golaha ama guddiga ku soo dhaweeyn soo jeedinta talo-bixin ku sabsan warbixinta.
6. Hab wafaaqsan rayiga (motion) ee gudiga, xubnaha ama wakiilada xisbi Warbixinta haddii loo arko in aanay xaqiiqo ahayn ama dhaliilo aas-aasi ah laga helo ama aan si faah –faahsan loo soo diyaarin si guddiga ay khuseeyso ay u soo hubiyan ayuu u xilsaari ama baadhis iyadoon loo bahan ayay talabooyinka ku cad qodobka 52(5) ee xeerkan ayaa lagu dhaqangalin.

**Qodobka 60$^{aad}$:- <u>Warbixinada ay guddiyadu Golaha u Soo Bandhigan</u>**

1. Guddi kasta hadba sida loogu bahdo waxay golaha u soo bandhigii warbixin ku sabsan waxqabadkooda shaqo.
2. Warbixinta guddiyadu ay soo bandhigayan waxay noqon;

b). arimaha mudan in u goluhu ogaado ama u go'aan ka gaadho ay tahay.

t). fulinta qorshayaasha shaqo iyo

j). Dhibaatooyinka lala kulmay iyo tallaabooyinka xalka ah ee la qaaday

3. Warbixinta guddiga waxaa soo jeedin guddomiyaha guddiga.
4. Warbixinta guddigu ay soo jeedinayan waxay lahan dulucda lagu tilmamay qodobka 56aad ee xeerkan.

**Qodobka 61aad <u>Baadhiista Cadaymaha</u>**

1. Goluhu markasta oo uu u arko muhiim wuxuu baadhi ama dhagaysan maragyo ama caddeymo.
2. Hanaanka uu goluhu ugu yeedhayo islamarkaana ku dhagaysanayo marag waa sida hoos ku cad:-

b). Goluhu hadba sida ay ugu haboon tahay wuxuu gole ahaan ama guddi ku dhagaysan marag ama ku baadhi karaa cadeymo dhokumeenti.

t) Wuxuu qoraal ugu yeedha qofka uu marag ahaan u rabo islamarkaana uu la socdosiin arrinta uu maraga ka yahay, goobta iyo wakhtiga loo bahan yahay.

j) Maragu wuxuu marag furkiisa ku bixin karaa qoraal ama af ahaan

x) Maragu inkastoo aan su'aal ahaan lagu waydiin wuxuu si dheeri ah ugu dari karaa marag furkiisa xogaha kale ee muhiimka u ah arrinta ee uu ogyahay.

3. Goluhu wuxuu ku amri karaa hay'adaha ama shakhsiyadka ay khusayso in ay ugu soo dhaweeyaan hanaanka hoos ku cad dhokumentiyada la halmaala arrinta uu qacanta ku hayo.

b) Wuxuu qoraal ku amri in dhokumeenti kasta wakhtiga uu ku rabo loogu keeno.

t) In dhokumeentiga uu rabo hadba sida xaaladu tahay ku dalbado in originaalka ama nuqulkiisa loo keeno.

j) Kadib marka uu baadho dhokumeentiga uu rabo waa in si habsami leh loogu celiyo hay'ada ama shakhsiga ay khusayso.

4. Goluhu marka uu hay'ad ka codsanayo in dhokumeentiga uu u bahan yahay loo soo dhaweeyo ama shakhsi ku amrayo in uu qaal marag bixiyo waa in uu tixgaliyo xoriyadaha iyo xadka lagu bayaamiyay dastuurka iyo shuruucda kale.

5. Qofka maraga bixinaya ama soo dhawaynaya dhokumeenti waa inuu maro dhaarta hoos ku cad:-

"*Aniga oo __________________________ waxaan ku dhaaranayaa in maraga an ku hor bixinayo ama dhokumeentiga an u soo dhawaynayo golaha ama gudigu uu sax yahay oo an waxna ku darin ama ka reebay una jirin*''.

6. Dhaarta ku cad farqada 5aad ee qodobkan waxaa qaban xubinka ay khusaayso.

**Qodobka 62aad** **<u>Amarka Hanti-Dhawr ee U Goluhu Bixiyo</u>**

1. Goluhu marka uu u arko in ay hay'adu miisaaniyadi la qoondeeyey aanay ku bixin ujeedada loogu tala galay ama u ogaado dhaliil wayn oo xaga isticmaalka miisaaniyada ah ama

ku tagrifal wuxuu amri karaa in la sameeyo baadhis (hanti – dhawr) xisaabeed.

2. Amarka baadhis ee u goluhu bixiyo waxaa fulin hanti dhawrka guud ee deegaanka ama cida kale ee ay u xilsaran.
3. Amarka hanti dhawr ee ku cad farqada 2aad ee qodobkan iyado u bixinayo af-hayeenku waa in u xuso.

(b) Hay'ada la rabo in la baadho.

(t) Arinta la baadhayo

(j) Xilliga warbixinta hanti dhawr la keenayo.

4. Kadib marka u goluhu dheegaysto warbixinta hanti dhawr hadba sida xaaladu tahay wuxuu qaadi talaabooyinka ku cad qodobka 52(5) ee xeerkan.

**Qodobka 63aad <u>Qabilaada</u> <u>Xogaha</u>**

1. Goluhu ama guddiyada joogtada ah waxay qabili karan xog (tilman) ku sabsan arimaha hoos ku cad;

b). dhibaato la gaadhsiiyay ama ku soo foodleh hantida iyo danaha dawladda ama shacabka.

t) Marka ay dhacan ama la qiiyaaso in ay dhcii karan arrimo halis ku ah nidaamka dastuuriga.

j) Marka ay dhacan arrimo caqabad ku ah siyaasadaha iyo istiratijiyadaha dawlada.

x). Marka la dareemo ama ay dhacaan isku-dhacyo shacab ama la hello ifafalo tilmamaya arrimahas oo kale.

kh). Marka lagu gafo xuquuqaha bini'aadaminimo.

d). Marka ay dhacaan masiibooyin dabiici ah ama kuwo aan dabiici ahayn.

2. Xog kasta oo la soo gudbinayo waa in ay wadato cadaymo run ah.

3. Xogtu waa in lagu soo gudbiyo qoraal islamarkaana ay ka koobnato magaca xog bixiyaha oo sadeexan, ciwaankiisa iyo saxeexiisaba.

4. Xogta aan hab wafaaqsan farqada 3aad ee sare lagu soo gudbin lama aqbalayo.

**Qodobka 64aad** **<u>Qaabilaada Cabashooyinka</u>**

1. Golaha ama gudiyada joogtadu arrimaha cabashooyinka ee hoos ku xusan ayay qaabili karaan :-

b) Cadaadisyada ama xadgudbyada maamul ee ka dhanka ah danaha shacabka

t) Ku tumashada xuquuqaha aadamaha

j) Arrimaha ka dhanka ah siyaasadaha iyo istiraatijiyadaha dawlada

x) Gudiyada joogtada ah cabashooyinka gaadhay ee aan xal loo helin

kh) Cabashooyinka xubnaha golaha ee la xidhiidha x/nidaameedka iyo awaamiirta golaha.

2. Cabashooyinka golaha loo soo gudbinayo waxaa soo gudbin karaa qofka geef tirsanaya ama qoyskiisa ama xafiis iyo hadba sida uu xaladu tahay qof kale.

3. Cid kastoo cabasho golaha u soo gudbinaysa waa in ay qoraal faah faahsan ku soo gudbiso oo gaar ahaan ay ku xusan

yihiin magaca, ciwaanka, saxeexa iyo caddeymo buuxa oo dhamaystiran.. Cabashada aan arrimahas soo buuxin marnaba lama hor keeni karo golaha.

4. Golaha looma soo gudbin karo cabasho ku saabsan arrin ay maxkamadi gacanta ku hayso islamarkaana aan helin go'aan Kama dambays ah.

5. Cabashada aan la soo Marin jaran jarooyinka hay'adaha ay arrintu khusayso si toos ah golaha looguma soo gudbin karo.

6. Cabashada waxaa loo soo gudbin karaa af-hayeenka ama gudiga joogtada ay arrintu khusayso. Af-hayeenku cabashada loo soo gudbistay hadii uu u arko mid buuxisay shuruudaha qodobkan ku xusan wuxuu ajande ahaan u hordhigi karaa golaha ama gudiga ay khusayso ayuu u gudbin karaa si uu u soo baadho.

7. Goluhu cabashada loo soo dhaweeyo marka uu ka doodo wuxuu awooda in uu ka soo saaro go'aamadan soo socda;

b) in uu arrinta gudi u saaro ama gudiga ay khusayso u gudbiyo si uu ra'yi go'aameed ugu soo gudbiyo.

t) Wuxuu go'aamin karaa hay'ada dawliga ah ee ay arrintu khusayso in ay arrinta xaliso.

j) In uu go'aanka ku haboon ka qaato isagoo oo ka duulaya dastuurka, shuruucda kale iyo hanaanka shaqo ee u dajisan.

8. Golaha go'aanka cabashada soo gaadhay cida soo cabatay wuxuu ku socodsiin isagoo u sii marinayaa af-hayeenka ama gudiga ay arrintu khusayso.

## **Qaybta Sagaalaad**

## Nidaamka Magaacaabida Iyo Xulashada

**Qodobka 65aad** **Mas'uuliyiinta u Goluhu Doorto, Xusho ama Magacaabistooda Ansixiyo**

Sida ay dhigayaan qodobada 49 (3)(g), 69(1)(2), 73(1), 102(2), 103(2) ee dastuurka deegaanku mas'uuliyiinta hoos ku xusan ayuu goluhu doortaa, xushaa islamarkaana magaacaabidooda ansixiyaa;

1. Af-hayeenka iyo af-hayeen ku xigeenka golaha
2. Madaxwaynaha iyo madaxwayne ku xigeenka deegaanka
3. Gudoomiyaha, Gudoomiye ku xigeenka maxkamada guud iyo garsoorayaasha kale ee maxkamadaha heerarka kala duwan
4. Xubnaha golaha hawl fulinta
5. Hanti dhawrka guud ee deegaanka
6. Mas'uuliyiinta iyo madaxda kale ee magacaabistooda goluhu in uu ansxiyo ay tahay

**Qodobka 66aad** **Hanaanka Doorashada Madaxwaynaha**

1. Sida uu dhigaayo qodobka 60(1) ee dastuurka waxaa madaxwaynaha dawlada deegaanka laga soo sharaxa xubnaha ka tirsan golaha ee ku soo baxa xisbiga ama asxabta ku guulaystay aqlabiyada kuraasta ugu badan ee golaha.
2. Sida ku cad qodob hoosaadka (1) ee qodobkan, xubinka wakiilka u ah xisbiga ama asxabta aqlabiyada kuraasta ku guulaystay ayuu af-hayeenku fursad u siin in uu golaha u soo dhaweeyo xubinka madaxwaynenimada loo soo sharaxay.

3. Goluhu wuxuu si toos ah u ansixin xubinka madaxwaynenimada loogu soo dhaweeyay si waafaqsan qodob hoosaadka (2) ee qodobkan.

Madaxwaynuhu isla kalfadhigaas wuxuu soo hordhigi islamarkaana ka ansixin golaha xubnaha golihiisa fulinta isagoo ka ambaqadayaa qodobka (93) ee x/nidaameedkan.

**Qodobka 67aad** **<u>Hanaanka Ansixinta Magacaabista Garsoorayaasha</u>**

1. Sida ay dhigayaan qodobada 49(3)(g), 69(1), 61(3)(j) ee dastuurka wuxuu goluhu magacaabaa gudoomiyaha iyo ku xigeenka maxkamada guud marka uu soo dhaweeyo madaxwaynaha deegaanku.
2. Sida ku cad qodobka 69(2) ee dastuurka iyo bayaanka tirsigiisu yahay 37/1996 ee aasaasida gudiga maamulka garsoorka ayaa wuxuu goluhu magacaabaa garsoorayaasha maxkamadaha kala duwan ee deegaanka ee uu soo dhaweeyo gudiga maamulka garsoorka deegaanku.
3. Sida ku cad qodob hoosaadka (1) iyo (2)ee qodobkan gudiga maamulka garsoorku xubnaha garsoorayaasha ah ee ay soo sharaxeen si uu goluhu u magacaabo waa in ay soo raaciyaan xogta xubin kasta oo dhamaystiran .
4. Wixii dood ama su'aalo ah ee ay xubnaha goluhu ka soo jeediyaan xubnaha garsoorenimada loo soo sharaxay, madaxwaynaha ama gudiga maamulka garsoorku waa in ay dooda goobjoog u ahaadaan islamarkaana ay jawaabta ku haboon ka bixiyaan kadibna goluhu inta uu ka doodo u ansixiyo.

5. Hadii uu goluhu uu u arko xogta murashaxa looga baahnaa in aan la soo dhamaystirin goluhu ansixintiisa ayuu hakin illaa la soo dhamaystiro.
6. Goluhu xubinka garsoorenimada loo soo sharaxay hadii uu garwaaqsado in uu qabo dhibaato aasaasi ah codsiga magacaabista ayuu laali karaa.
7. Marka hab wafaaqsan sharciga, ay gudiga maamulka garsoorku ay islaqaataan islamarkaana ay u soo gudbiyaan golaha,goluhu inta u arinta baadho ayuu go'aan kama danbays ah ka gaadhi.

**Qodobka 68aad** **Magacaabista Madaxwayne Ku-Xigeenka, Xubnaha Golaha Fulinta, Hanti Dhawrka Guud $ Mas'uuliyiinta Kale**

1. Madax-waynaha dawlada deegaanku isagoo ka anbaqadaya Qodobada 61(3)(j)(x) iyo 49(3) (g) ee dastuurka wuxuu kalfadhiga golaha soo hordhigayaa magacaabidda madax wayne ku-xigeenka, hanti dhawrka guud, madax xafiiseedyada ka tirsan golaha kabineetka iyo sidoo kale masuuliyiinta kale ee sharcigu siinayo in madxa-waynuhu golaha ka ansixiyo.
2. Madax-waynuhu isagoo ka duulaya sida uu dhigayo farqada 1aad ee Qodobkan, waa in uu codsiga magacaabista soo raaciyo xog dhamaystiran ee xubin kasta.
3. Madax waynuhu waa in uu masuul kasta oo golaha la hor keenay oo la soo magacaabay sharaxaad ballaadhan ka bixiyo su'aalaha iyo doodaha goluhu ka soo jeediyo.

4. Goluhu marka uu ka doodo arrinta la soo hordhigay ee magacaabidda ah wuu ansixin karaa ama wuxuu raaci karaa farqada 2aad iyo 5aad ee Qodobka 32aad ee la xidhiidha jihooyinka go'aaminta hadba sida ugu haboon.
5. Marka laga reebo madax-wayne ku xigeenka marka uu madax-waynuhu shaqo ka joojin ama shaqo ka caydhin ku sameeyo, Xubnaha golaha fulinta iyo masuuuliyiinta kale ee madax-wayanaha hoos yimaadda ee ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan waa in uu talaabadiisa ogaysiiyaa af-hayeenka islamarkaana uu soo hor dhigo kalfadhiga ugu soo horeeya ee golaha .
6. Masuuliyiinta hay'adaha hoos yimaada golaha ee markoodii hore xulashadooda madax wayanaha ama cid kale golaha ka ansixiyay waxaa si sharciga waafaqsan xilka uga qaadi Karaa oo kaliya golaha.

**Qodobka 69aad <u>Masuuliyiinta Magacaabistooda Tooska uu u Ansixiyo Goluhu</u>**

1. Masuuliyiinta magacaabistooda uu goluhu toos u ansixiyo waxaa golaha u soo dhawayn islamarkaana ka ansixin af-hayeenka golaha ama gudiga ay khusayso.
2. **S**ida ku xusan Qodob hoosaadka 1aad ee qodobkan cidda golaha codsiga magacabista soo hordhigaysa waa in ay xogta guud ee qofka la magacaabayo golaha soo hor-dhigto.
3. Iyada oo uu sideeda yahay qodob hoosaadka 2aad ee qodobkan, wuxuu goluhu hadba sida ay ugu haboon tahay u

adeegsan karaa arrimaha ku xusan qodobka 53 (3) iyo (5) ee x/nidaameedkan.

**Qodobka 70[aad] Dhaarta**

1. Masuul kasta oo magacaabistiisa uu goluhu ansixiyo waa in golaha lagu hor dhaariyo.
2. Masuuliyiinta la magacabayo iyagoo ilaalinaya sharafta iyo karaamada golaha ee la xidhiidha qaybta borotokoolka ee golaha ayay hor iman islamarkaana golaha hortiisa u ku dhaarin gudoomiyaha ama ku xigeenka maxkamada guud.
3. Hanaanka iyo dulucda dhaartu waa sida hoos ku xusan;

*"Aniga oo ah ____________ waxaan xilka la ii magacaabay maanta ee ah ---------------- an golaha hortooda uga balan qaadayaa in an dastuurka daacad u ahay xilka iyo masuuliyada deegaanka iyo dawlada u qaadayaa in an si firfircooni iyo daacdnimo ay ku dheehantahay u guto islamarkaana shaqooyinka iyo waajibaadka an u fuliyo hab wafaaqsan sharciga"*

4. Qofka la dhaarinayo marka uu yahay gudoomiyaha maxkamada guud ama gudoomiye ku-xigeenka waxaa dhaarin xubin ka mid ah gudiga maamulka garsoorka.
5. Masuul kasta oo la magacabay isagoon marin hanaanka dhaareed ee ku xusan qodob hoosaadka 3[aad] ee Qodobkan shaqada loo magacaabay ma qaban karo.
6. Haddan sobab macquul ah oo lagu qanci karo ayna jirin qof kasta oo goluhu ansixiyay waa in uu islamarkaaba golaha hortiisa ku dhaarto.

7. Sida uu dhigayo farqada 6aad ee Qodobkani masuulka aan golaha hortiisa ku dhaaran mark ay xubnaha goluhu soo jeediyaan arinta dhaar la'aanta ah ee masuulkaas, goluhu wuxuu kala noqonayaa ama burinayaa ansixinta magacaabida masuulkaas.
8. Goluhu marka uu magacaabid ansixinayo ama burinayo sida ku xusan farqada 7aad ee Qodobkan, wuxuu ogaysiin cida xulashada magacaabistiisa lahayd iyo laamaha ay khusayso oo dhan.

## <u>Qaybta sidedaad</u>

## <u>Fursadaha uu Goluhu uu diyaariyo xubnaha si ay ula kulmaan Shacabka soo doortay</u>

### Qodobka 71aad <u>Ujeeddada</u>

Waa in la isku dubarido fursadaha ay xubnaha goluhu shacabka soo doortay kula kulmaan si ay xog oggaal ugu noqdaan dhibaatooyinka kala duwan ee shacabka soo doortay ay qabaan isla markaana xal ugu raadiyaan.

### Qodobka 72aad <u>Wakhtiyada Ay la Kulmayaan xubnuhu shacabka Soo Doortay</u>

1. Xubin kasta oo golaha ka tirsan wuxuu xaq u leeyahay la kulanka shacabkii soo doortay mar kasta oo uu arrintaas lagama maarmaan u arko.

2. Goluhu wuxuu qorshe u samaynayaa marka ay lagama maarmaan ula muuqato xaalad markaas jirta in ay xubnuhu la kulmaan shacabka soo doortay.
3. Iyadoo ay jirto arinta lagu xusay Qodob hoosaadka 1[aad] haddana xubinku arrin kasta oo uu ku qanco ama u arko inay lagama maarmaan tahay ayuu kulano kala yeelan karaa shacabka soo doortay.
4. Marka ay xubnuhu la kulmayaan shacabka soo doortay waxay adeegsanayaan ama ku dhaqmayaan habkan hoos ku xusan;

b) Iyagoo haddba sida ugu haboon u shiriynaya shacabka.

t) Waa in Wada hadalo ay la yeeshaan hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahaynba.

j) Waxay soo uruurin cabashooyinka kala duwan ee ka jira goobahaas

x**)** Inay soo sameeyaan darasado iyo u kuurgalo kala duwan

kh) Inay dadaal ku muujiyaan sidii ay dhibaatooyinka jira ugu xallin lahaayeen wada hadalo ay kala sameeyaan hay'adaha ay arrintu khusayso ee heerarka kala duwan leh.

5. Goluhu wuxuu soo ururiyaa warbixinaha xubnuhu soo diyaariyeen wuxuuna ka bixiyaa ama siinayaa xal guud ama sidii xal loogu heli lahaa ayuu u dhigayaa.xubnaha su'aalihii ay golaha soo gaadhsiiyeen ayay dabagal ku samaynayaan hadba wixii xal ah ama go'aan ah ee goluhu ka bixiyay, goluhuna si ay arrimahaasi u hirgallaan wuxuu ka soo saarayaa wareegto.
6. Warbixinta ay xubnuhu soo diyaarinayaan ee ku xusan Qodob hoosaadka 4[aad] waa in loo soo diyaariyo qaabkan hoos ku

xusan, islamarkaana loo gudbiyo waaxda ay khusayso ee golaha:-

b) Qodobadii ugu muhiimsanaa ee laga dooday

t) Hababkii xubnuhu u adeegsadeen qabsoomida doodaha

**j)** Dhibaatooyinka ugu waawaynaa ee ka hor yimid iyo wixii lagu xalliyay.

**x)** waa in la soo diyaariyo qoraal ay si cad uga muuqdaan Goob doorashadii doodu ka dhacday, magaca iyo saxeexa xubinka

**Kh)** Fikirka ama ra'yiga xubnaha

7. Goluhu si ay xubnaha ugu sahlanaato kulanadaasi wuxuu isku dubaridayaa sidii guud ahaan xubnaha loogu gacan siin lahaa.

## Qodobka 73[aad] Doorka uu Goluhu Ka Qaadanayo Kulamada Ay Xubnaha iyo Shacabu Yeelanayaan

1. Goluhu wuxuu diyaarin karaa qorshaha arrinta uu lagama maar maan u arko in ay xubnaha goluhu kala kulmaan shacabka soo doortay oo ay macluumaad uga soo uruuriyaan islamarkaana warbixin uga soo gudbiyaan.
2. Goluhu warbixinta ay xubnuhu u soo gudbiyeen ayuu qaabili oo uu xalin islamarkaana gashi ahaan ugu adeegsan hawlaha golaha wuxuuna dabagal ku sameyn dhaqan galka go'aamada la xidhiidha warbixinta.
3. Warbixinta golaha loo soo gudbinayo waa in ay ka koobnaato arrimaha soo socda;

b) Arrimaha muhiimka ah ee wada xaajoodka laga galay

t) Tabaha ay xubnuhu u adeegsadeen uruurinta talla bixinada

j) Arrimaha muhiimka ah ee kulanka ka soo baxay ama laga helay

x) Dhibaatooyinka muhiimka ah ee lala kulmay iyo tallaabooyinka xal ahaanta loo qaatay.

kh) Fikirka iyo ra'yiga arrinta la xidhiidha ee xubnaha ama xubinka

d) Magaca xubinka ama xubnaha, saxeexooda iyo magaca goob doorashada.

4. Xubnuhu marka ay codsadaan taageero u suura galisa in ay sida ugu haboon u gutaan hawlaha ay kala kulmayaan shacabka soo doortay goluhu wuxuu isku duba ridi fursado taageero ay uga helaan maamulada goobaha laga soo doortay.
5. Wada tashiga ama wada xaajoodka ay xubnaha goluhu kulankooda kala yeelanayaan shacabka soo doortay waa in ay la xidhiidhan arrimaha awooda dawlada deegaanka hoos yimaada.
6. Xubin kasta oo golaha ka tirsan marka uu la kulmaayo shacabka soo doortay arrimaha ka baxsan awooda dawlada deegaanka ee ay shacabku u soo jeediyan waxay u soo gudbin af-hayeenka golaha warbixinta la xidhiidha arrimahaasi si uu ugu gudbiyo ciddaha ay khusayso.

**Qodobka 74aad** **<u>Hanaanka Kulanada xubnaha iyo shacabka soo Doortay</u>**

Xubnaha goluhu waxay shacabkii soo doortay ula kulmi karaan hanaankan soo socoda;

1. Hadba sida ugu haboon in ay u shiriyaan shacabka
2. In ay la xaajoodaan hay'adaha dawliga iyo kuwaan dawliga ahayn

3. In ay soo uruuriyaan islamarkaana u soo kuur galaan tilmaamaha, tallooyinka iyo xogaha ay shacabka ka helaan

## Qaybta Kow Iyo Tobnaad

## Hawlaha kale ee golaha

### Qodobka75aad Xasaanad Ka Qaadista Xubin Ka Tirsan Golaha

1. Sida uu dhigayo Qodobka 48 (5) ee dastuurka iyo qodobka 79 ee x/nidaameedkan xubin ka tirsan goluhu hadii aan lagu qaban isagoo faldambiyeed culus faraha kula jira hay'adaha dawladu ma qaban karan lamana dacwayn karo iyadoo aan ogolaansho laga helin golaha xataa hadii uu isagu raali ka yahay.
2. Hay'ada doonaysa in xubinka xasaanada looga qaado waa in ay codsigeeda ku soo salayso hannaan waafaqsan arrimaha hoos ku xusan:-

b). Dambiga xubinka looga shakiyay marka uu yahay mid heer qaran ah oo awoodiisa dacwad oogista sharcigu siinayo wasaarada caddaalada ee fadaraalka waxaa qoraalka codsiga xasaanad ka qaadista golaha u soo gudbin islamarkaana soo saxeexi wasiirka wasaarada caddaalada.

t). Dambiga xubinka looga shakiyay marka uu yahay mid heer deegaan ah oo awoodiisa dacwad oogista uu sharcigu siinayo xafiiska xeer-illaalinta guud iyo caddaalada ee deegaanka waxaa qoraalka codsiga xasaanad ka qaadista golaha u soo gudbin islamarkaana soo sexeexi madaxa xafiiska.

j). Marka awooda sharci ee oogida dacwada dambiga xubinka looga shakiyay uu yeesho xafiiska caddaalada ee deegaan kale

waxaa codsiga u soo gudbin golaha islamarkaana soo saxeexi madax-waynaha deegaankaasi ay khusayso.

3. Codsi kasta oo lagu dalbayo xasaanad ka qaadista waa in uu noqdo qoraal oo loo soo dhaweeyo af-hayeenka golaha.

4. Af-hayeenku codsiga xasaanad ka qaadista ee loo soo gudbiyo wuxuu toos u hordhigi karaa golaha ama gudiga joogtada ah ee arrimaha maamulka iyo sharciyada ayuu u gudbin karaa.

5. Goluhu codsiga xasaanad ka qaadista ee uu soo dhaweeyo af-hayeenku wuxuu hadba sida uu xaalku yahay baadhitaan iyo fikir go'aameed ugu gudbin karaa gudiga joogtada ah ee arrimaha maamulka iyo sharciyada ama si toos ah ayuu go'aan uga qaadan karaa.

6. Gudiga loo gudbiyay arrinta xasanad ka qaadista marka uu diyaarinayo warbixinta baadhitaan ee ku wajahan arrinta waxaa uu u raacayaa nidaamkan soo socda:-

b). Dambi galista xubinka caddayntiisa inkastoo ay maxkamadu leedahay hadana waxaa gudiga uu waajib ka saaran yahay xaqiijinta in ay jiran sababo si cad u muujinaya oo xasaanada lagaga qaadi karo xubinka.

t). Guddigu si uu u xaqiijiyo jiritanka sababaha ku xusan xarafka (b) ee qodobkan, wuxuu dalban karaa caddaymaha qoraalka iyo maragyada iskugu jira ee la xidhiidha arrinta, sidoo kale laamaha ay khusayso arrintu ayuu u yeedhi karaa waxna ka waydiin karaa marka loo baahdana xubinka arrint ku socoto laftisa ayuu wax ka waydiin karaa.

j). Guddigu marka uu diyaarinayo ra'yi goaameedka ku aadan baadhitaanka waa in uu ahmiyada siiyo culayska uu

leeyahay faldambiyeedka loo haysto xubinka iyo duruufaha kale ee tilmaamaya sida ay wax u dhaceen.

7. Goluhu isaga oo ka duulaya warbixinta iyo ra'yi go'aameedka loo soo dhaweeyo ayuu go'aan ka soo saari.
8. Af-hayeenka ayaa go'aanka uu gaadhay goluhu qoraal ku ogaysiin hay'ada soo codsatay xasanad ka qaadista iyo xubinka ay arrintu khusaysaba.
9. Xubinka xasanada laga qaaday wuxuu lahaan xuquuqahan soo socda:-

b) Iyadoo ay sidooda yihiin arrimaha lagu xeeriyay shuruucda kale, xubinimada golaha xubinku ma waayayo.

t). Faa'iidooyinkii iyo gunooyinkii uu xubinimada hore ugu heli jiray iyo kuwa uu xidhitaanka awgeed ku waayi karinba Kama go'ayaan.

10. Xubinka faldambiyeed looga shakiyay awgeed xasanada looga qaaday hadii dambi kale looga shakiyo ogolaanshaha golaha la'aanteed lama qaban karo lamana eeddeyn karo.

11. Xubinka waxay xasanadu ugu soo noqon karta arrimaha hoos ku xusan:-

b). Marka ay hay'adaha baadhista iyo oogida dacwada leh ay caddeymo ku filan oo lagu oogi karo u waayaan. Sidaasna uu ku xidhmo galdacwadeedkii islamarkaana loo celiyo xoriyadiisii.

t). Marka ay maxkamada arrinta qaadaysa ay ku waydo dambiga loo haystay.

j). Haddii aanay jirin shuruuc kale oo ka soo horjeeda, marka uu dhamaysto xukunkii xadhiga ee ay maxkamadu ku xukuntay.

4. Guddiga joogtada ah ee arrimaha maamulka iyo sharciyadu wuxuu isagoo si toos ah faragalin ugu samaynin hay'adaha caddalada ee gacanta ku haya dacwada xubinka xasaanada laga qaaday ayuu dabagal ku samayn marka loo haahdana uu warbixin ku saabsan xaalada xubinka u soo gudbin golaha.

5. Hay'adda lahayd codsiga xasaanad ka qaadista xubinka waa in ay golaha qoraal ku ogaysiiso natiijada ay ka gaadheen dacwadii xubinka.

**Qodobka. 76aad <u>Ka Qayb-Galka Shirarka Iyo Booqashooyinka Golaha</u>**

1. Xubnaha goluhu iyagoo matalaya wakiilna ka ah golaha ayay ka qayb gali karan shirar iyo booqashooyin dalka gudihiisa iyo dibadiisaba ah.
2. Xubinka matalaya golaha ee ka qayb gala shir iyo booqashooyin waa in uu ahaado mid ay arrintu la xidhiidho oo ku haboon.
3. Golaha ama af-hayeenka ama guddiga ay khusayso ayaa xulanaya xubnaha ka qayb galaya shirarka iyo booqashooyinka loo baxayo.
4. Xubinka isagoo matalaya golaha booqashooyin iyo shirar ka soo qayb qaata waxaa looga bahan yahay in uu warbixin guud oo ku sabsan hawshii uu ku maqanaa u soo gudbiyo qaybtii ay khusaysay ee uu wakiilka ka ahaa iyo af-hayeenkaba.
5. Goluhu waa inuu u sameeyo hanaan guud oo lagu xafido warbixinada shirarka & booqashooyinka xubnaha goluhu ay sameeyaan.
6. Marka casuumada Marti sharafeed golaha loo fidiyo ama loogu yeedho waxaa magaca golaha ku tegi karaa ama kaga qayb qaadan karaa, af-hayeenka, af-hayeen ku xigeenka ama xubin uu af-hayeenku uu wakiisho.
7. Casuumada Marti sharafnimadu hadday tahay mid loogu baahan yahay khudbada furitaan ama xidhitaan xafladeed waa inu uu si diyaarsado hanaan golaha matali karaa oo qoraal ah Lana xidhiidha xaaladda.

**Qodobka 77aad <u>Abaal-gudyada</u>**

1. Guluhu wuxuu abaal Marin iyo deeq sharafeed ku bixin karaa arrimahan hoos ku xusan:-

   b). Hay'adaha ama shakhsiyaadka heer deegaan ee muujiya waxqabad natiijo lagu Dayan karo leh.

   t). Martida heer federal ama deegaanada kale ee golaha ugu timada boqasho.

   j). Martida iyo hay'ada dalka dibadiisa ka soo booqda golaha.

   x). Xubnaha iyagoo matalaya golaha booqda deegaanada kale, federaalka ama dalka dibadiisa oo sharaf ahaan u siiya dalka (hay'adaha), deegaanada kale, faderaalka ama dalalka ay tagaan ee ay booqadaan.
2. Abaalmarin kasta oo lagu bixnayo magaca golaha waa in ay ka muuqato astaanta goluhu.
3. Goluhu wuxuu abaal Marino iyo haddiyado ka qaadan karaa qaybaha kale ee wadanka gudahiisa iyo dabadiisaba.
4. Goluhu hadiyad sharafeedka uu bixinayo iyo kuwa la siinayaba, waa in ay noqdaan kuwa dhawraya sharafta iyo sumcada wanaagsan ee golaha, deegaanka iyo wadankaba.
5. Xubin kasta oo magaca golaha ku soo qaada hadiyado iyo abaal-marino lagu sharfay waa in uu gudoonsiiyo af-hayeenka. Hadyadaha iyo abaal-marinada golaha la siiyo waa in lagu xafida meel ku haboon.

**Qodobka 78aad** **<u>Marti Sharafeed</u>**

1. Golaha ama af-hayeenku macsuumyada Marti sharaf ahaanta loogu fidiyo hadba siday munaasibka u tahay ayay uga qayb gali karaan

2. Marti sharafka loo fidiyo golaha, waxaa gole ahaan uga qayb gali karaa af-hayeenka, af-hayeen ku xigeenka ama xubinka uu af-hayeenku wakiisho.
3. Marka Marti sharafnimadu ay tahay mid la xidhiidha furitaan ama xidhitaan xafladeed waa in qoraalka arrinta ku haboon oo laga sii baaraan dagay lala tago.

## Qaybta Labo Iyo Tobnaad

## Xuquuqaha Xubnaha Golaha

### Qodobka 79aad. Xuquuqda In aan Laqaban Karin Lana Dacwayn Karin

Sida uu dhigayo Qodobka 48(5) ee dastuurka xubin kasta oo ka mid ah golaha hadii aan lagu helin isagoo faldambiyeed culus faraha kula jira ama aan golaha ogolaansho laga helin lama qaban karo lamana dacwayn karo.

**Qodobka 80aad** **<u>Xuquuqda Ku Hadalka Luuqadiisa</u>**

Sida uu dhigayo Qodobka 20aad ee xeerkani xubin kasta oo ka mid ah golaha marka ay socdaan kal-fadhiyada goluhu wuxuu xaq u leeyahay in uu luuqadiisa ku hadlo.

**Qodobka 81aad** **<u>U Madax Banaanida Fikir iyo Aragti Ee xubinka</u>**

Sida uu dhigayo qodobka 48(4) ee dastuurku xubin kastoo ka tirsan golaha codka iyo fikirka uu ka dhiibto golaha dhexdiisa laguma dacwayn karo tallaabana lagagama qaadi karo.

**Qodobka 82aad** **<u>Xuquuqda La Kulanka Shacabka Soo Doortay</u>**

Xubin kasta oo ka tirsan golaha marka uu u arko inay ku habboon tahay islamarkaana ay lagama maarmaan tahay, wuxuu xaq u leeyahay in uu la kulmo shacabka soo doortay iyo qaybaha kale ee bulshoba.

**Qodobka 83aad** **<u>Xuquuqda ka qayb galka shirarka gudiyada</u>**

Xubin kasta oo golaha ka tirsan wuxuu cod la'aan kaga qayb qaadan karaa shirarka ay qabtan gudiyada joogtada ah ee goluhu.

**Qodobka 84aad** **<u>Xuquuqda Soo Curin Ajande</u>**

Xubin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu soo curiyo qormo sharci oo qabyo ah iyo ajande una gudbiyo golaha.

**Qodobka 85aad Xuquuqda Gunno, Habeen Dhax Iyo Noolka**

1. Xubinka ka soo qayb gala shirarka ama kalfadhiyada golaha wuxuu xaq u leeyahay inu helo H/dhax & noolba.
2. Xubin goobaha fog laga soo doorto marka ay u ambabaxayaan la kulanka shacabka soo doortay ama hawl kasta oo kale oo shaqada golaha la xidhiidha u socdaalayo waxay xaq u leeyihiin in ay hab waafaqsan nidaamka maaliyadeed ee dawlada in ay helaan habeen dhax iyo noolka safarka.
3. Iyadoo ay sideeda yihiin xuquuqaha ku xusan qodob hoosaadkan, hoggaamiinta sare ee goluhu sida af-hayeenka, af-hayeen ku xigeenka, madaxa xafiiska, gudoomiyayaasha iyo ku xigeenada gudiyada joogtada iyo xubnaha kale ee goluhuba waxay xaq u leeyihiin guno iyo mushaaaraad u dhigma mas'uuliyada ay hayaan oo awaamiir lagu xeerin doono.

**Qodobka 86aad Xuquuqda ka tanaasulida xubinnimada golaha**

1. Xubinku wuxuu markasta oo uu rabo ogolaanshihiisa uga bixi karaa xubinimada golaha.
2. Xubinka rabitaankiisa uga baxaa xubinnimada golaha waa inuu codsiga arrinta qoraal ugu gudbiyo af-hayeenka golaha.
3. Af-hayeenku codsiga loo soo gudbiyay wuxuu ogaysiin golaha.
4. Laga bilaabo wakhtiga uu af-hayeenku golaha ogaysiiyo ayay dhamaanaysa xubinnimada xubinku.

**Qodboka 87aad Xuquuqda helitaanka kobcinta awooda iyo xogaha**

1. Goluhu illaa heerka ay awoodiisu u saamaxdo ayuu xubnaha u fidin tababaro lagu dhisayo heerkooda aqooneed iyo u fudaydinta macluumaadka xogeed ee la xidhiidha shaqada.
2. Goluhu marka hawlaha kobcinta awoodeed ee uu xubnaha u fidinayo wuxuu ahmiyad iyo mudnaan gaar ah siin xubnaha haweenka ee golaha ka tirsan.

**Qodobka 88aad <u>Xuquuqda xubin Hore</u>**

Iyadoo aan waxba loo dhimayn shuruucda kale waxay xubnaha hore uga tirsana goluhu ay yeelan xuquuqahan hoos ku xusan:-

1. Wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo shahaado sharafeed muujinaysa waxqabadkiisii hore ee shaqada, aqoonsi iyo qoraal caddeynaya xubinnimadiisii/deedii hore ee golaha.
2. In mudooyinkii uu shaqada xubinnimada ka hayay golaha loogu tix gasho shaqaalayntiisa dambe in uu shaqo adeeg dawladeed soo hayay mudadas loo xisaabiyo.
3. Wuxuu xaq u leeyahay in uu fursad u helo galitaanka xarunta golaha, isticmaalo maktabada golaha islamarkaana soo bandhigi karo fikiradaha waxtarka u leh hawlaha iyo waxqabadka golaha.
4. Wuxuu xaq u leeyahay in loo sameeyo qoraalo taageero ugu noqon karaa shaqadiisa iyo marka ay la soo darsaan dhibaatooyin la xidhiidha arrimaha bulsheed iyo fursadaha uu ku helayo adeegyada kale.

**Qodobka 89aad <u>Xuquuqda Illaalada</u>**

1. Xubnaha hogaaminta ee goluhu sida af-hayeenka iyo af-hayeen ku xigeenku waxay xaq u leeyihiin in ay illaalo ku filan u helaan naftooda iyo goobaha ay degan yihiinba. Sidoo kale, xubnaha goluhu marka ay gudanayaan hawlaha golaha waxay xaq u leeyihiin in ay helaan ilaallo nabad galyo oo ku filan.
2. Xuquuqaha qodob hoosaadka sare lagu xusay waxaa dhaqan galin af-hayeenka golaha oo la kaashanaya ciddaha ay khusayso.

## ***Qaybta Saddex Iyo Tobnaad***

## ***Anshaxa iyo Wajibadka Shaqo Ee Xubnaha***

**Qodobka 90aad** ***Mabda Guud***

Xubin kasta oo ka tirsan golaha waxaa looga bahanyahay inuu ku dhaqmo islamarkaana ku shaqeeyo mabiidiida anshaxa guud ee heer qaran iyo heer deegaanba.

**Qodobka 91aad** Kor ***U Qadida Hiddaha Iyo Dhaqanka Deegaanka***

Xubin kasta:-

1. Waa in uu ahaado mid daacadnimo iyo karti ugu adeega islamarkana ixtiraama oo tusaale u noqda umada deegaanka iyo shacabka sida tooska ah u soo doortay.
2. Waa in uu xurmeeyo dastuurka deegaanka iyo shuruucda kale islamarkaana uga shaqeeyaa sidii dadka kalena u xurmeyn lahayeen.

3. Waa in waxqabadkiisa iyo aragtidiisa guudba ay ku salaysnaadaan mar walba horaysiinta, illaalinta, sugida iyo xushmaynta danaha guud ee deegaanka iyo shacabka.

**Qodobka 92aad** ***Cad-caddaan iyo Daacadnimo***

1. Iyada oo aan wax loo dhimayn arrimaha lagu xeeriyay qodobka 125 ee xeer-nidaameedkan xubin kasta oo ka tirsan goluhu waa inuu cad-caddaan iyo daacadnimo ka muujiyo fagarayaasha kala duwan ee lagaga wada hadlayo danaha guud ee dadwaynaha.
2. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waxaa ka reeban in uu golaha horkeeno arrimo aan la xaqiijin ama caddaymo been abuur ah oo uu run u ekaysiinayo.

**Qodobka93aad. Ku Dhaqanka Xadka Awoodeed**

1. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waa inuu si munaasab ah u isticmaalo awoodda sharci iskana ilaaliyo inuu si sharciga ka baxasan ugu tagrifalo awoodiisa.
2. Iyadoo aan wax loo dhimayn arrimaha sida guud loogu xeeriyay qodob hoosaadka 1aad ee Qodobkan, xubin kasta oo ka tirsan goluhu marka uu gudanayo xilka iyo waajibaadyada ka saaran sugida danaha shacabka iyo deegaanka, waxaa ka reeban in uu xilka u adeegsado danihiisa shakhsiyeed iyo eex.

**Qodobka: 94aad Xil Guddusho Haboon**

1. Wajibaadyada xeerkan iyo shuruucda kale lagu qeexay iyadoo ay dhawarsaan yihiin xubin kasta oo loo xil saaray in uu

shaqo ka qabto ama loo wakiisho shaqooyinka golaha waa in uu si buuxda oo niyadsami leh u qabto islamarkaana si xilkasnimo leh u guto mas'uuliyada la saaray.

2. Xubin kasta oo ka tirsan golaha isagoo adeegsanaya aqoontiisa iyo khibradiisa shaqo waa in uu si buuxda uga soo baxo xilka uu umada u qaaday islamarkaana sida ugu haboon u guto wajibaadyada shaqo ee uu goluhu u xil saaro.
3. Xubin kasta oo golaha ka tirsan waa in uu shirarka iyo hawlaha golaha wakhtiyadooda ka qayb qato oo uu kaalin fir fircoon ka qaato.

**Qodobka 95aad** **Ilaalinta Sharafta Iiyo Sumcada Golaha**

1. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waxaa waajib ku ah goob kasta oo uu joogo in uu illaaliyo sharafta iyo sumacada golaha.
2. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waa in uu ka fogaado ku dhaqanka ficilada aan haboonayn.
3. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waxaa ka reeban in xarunta golaha dhaxdeeda uu qof kale ku aflagaadeeyo, ku daan daansado ama caqabadeeyo hawlaha golaha.

**Qodobka96aad** **Ilaalinta Sirta**

Iyadoo hadafka guud ee cad-cadaanta shaqada xubnuhu ay sidooda yihiin ayaa hadana waxaa xubin kasta waajib ku ah in uu qaabka soo socda uu siraha u illaaliyo.

1. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waa in uu sir ahaan u xafido oo uu hayo xoggaha uu shaqadiisa awgeed ku ogaado

ama meelo iyo qaabab kale ku ogaado ee waxyeeli karaa danaha shacabka iyo dawladaba.

2. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waa in uu xafido arrimaha uu goluhu kaga wada hadlayo shir albaabadu u xidhan yahay ee aan wali goluhu shaacin.

3. Xubin kasta oo ka mid ah gudiyada joogtada ah waa in uu xafido islamarkaana dhawro arrimaha uu wali gudigu gacanta ku hayo ee aanu gudigu warbixintooda u gudbin golaha.

**Qodobka 97[aad] <u>La Dagaalanka & Ka madax bannaanida Musuqa</u>**

1. Xubin kasta oo golaha ka tirsan waa in uu nadiif ka ahaado arrimaha musuqa islamarkaana si adag uga hortago lana dagaalamo musuq-maasuqa oo uu tusaale lagu dayan karo uga noqdo ololaha la dagaalanka musuq-maasuqa.

2. Xubin kasta oo golaha ka tirsan codka ama fikirka uu golaha dhexdiisa ka dhiibanayo waa in ayna ahaan kuwo lacag lagu muquuniyay ama waa in aanu af-laaluush qaate ku hadlin.

3. Xubin kasta oo ka tirsan goluhu waa in uu nadiif ka ahaado xatooyada xoolaha dadwaynaha, khiyaamada, ammaano-lunsiga, qabyaalada iyo dambiyada kale ee la hal maala.

4. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waxaa waajib ku ah in uu hantida iyo xoolaha uu shakhsi ahaan u leeyahay si sharciga waafaqsan u diwaangaliyo.

**Qodobka 98[aad] <u>Ka Waantowga Isku Dhufashada Shacabka</u>**

1. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waxaa waajib ku ah in uu ka waantoobo islamarkaana ka fogaado wax kasta oo sababi

karaa isku dhac labo shacab ama qabiil, kacdoon, qas, shaqo joojin iyo falal kale oo la hal maala oo sharci daro ah.

2. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waxaa ka reeban in uu bixiyo fikir iyo talla bixin uu dhinac ku taageerayo dhinacna ku cambaaraynayo oo keeni karaa isku dhac labo qoowmiyadood, qabiil iyo diimood.

**Qodobka 99aad. La xisaabtan**

Xubin kasta oo hawl qabanaya waa inu maanka ku hayo in lagula xisaabtami doono mas'uulna ka noqon doono.

**Qodobka 100 aad Hormoodnimo**

1. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waxaa looga bahan yahay inuu ahaado mid is-xilqaama oo wax hoggaamiya islamrkaana lahado kalsooni iyo go'aan qaadasho mas'uulnimo.
2. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waxaa looga bahan yahay is-xilqaan, dareen lahaansho, shaqo jacayl iyo hab-dhaqan wanaagsan oo tusaale hormood ah u noqon karaa shacabka iyo bah wadaagta shaqo.

**Qodobka 101aad. Is-Ku dhaca danaha**

1. Xubin kasta oo goluhu xil u dhiibo ama u wakiisho marka uu ku guda jiro hawsha uu qabanayo hadii ay hor timado arrin danihiisa ama dan qaraabadiisa la xidhiidha waa in uu arrinta ogaysiiyo af-hayeenka ama gudiga joogtada ah ee uu xubinka ka yahay islamarkaana iskii uga baxo eegista arrinta.

2. Xubin kasta oo ka tirsan golaha waa in uu ka fogaado qabashada hawl aan u qalmin mas'uuliyada ama xilka uu umada u hayo ama hoos u dhigaysa sharafta iyo sumcada golaha xataa hadii lagu shaqaaleeyo ama shakhsi ahaanba.

## Qaybta Afar iyo Tobnaad

## Illaalinta Xuquuqaha iyo Anshaxa Xubnaha Golaha

**Qodobka102^aad.^ Hadafka Guud**

Iyadoon waxba loo dhimin arrimaha wajibaad ee lagu bayaamiyay shuruucda kale iyo Qodobada xeer-nidaameedkan, xuquuqaha xubnaha golaha, anshaxa iyo illaalinta waajibaadyada shaqo waxaa lagu fulin hab wafaaqsan Qodobada soo socda ee qaybtan.

**Qodobka 103aad. __Illaalinta Xuquuqaha__**

1. Xubin kasta oo ka tirsan golaha ama horay xubin uga ahaa jiray golaha marka ay tirsanayaan xadgudub xuquuqeed ama in loo sugo xuquuqahooda waxay codsiga cabashadooda qoraal ugu gudbinayaan af-hayeenka ama gudiga joogtada ah ee arrimaha maamulka iyo sharciyada.
2. Iyadoo ay jirto arrimaha ku xusan farqada 1aad ee Qodobkan haddii ariinta cabashadu tahay mid xubnaha badankooda ay qaban wakhtiga kala fadhiga caadiga ah ee goluhu jiro ayaa ajande ahaan loo soo gudbin karaa.
3. Gudiga codsiga cabashada loo dhawaysto inta uu arrinta baadhitaan ku sameeyo ayuu racigooda u gudbin af-hayeenka.
4. Af-hayeenku marka loo soo gudbiyo arrimaha ku xusan qodob hoosaadyada (1) iyo (3) ee qodobkan wuxuu qaadan karaa talaabooyinkan soo socda:-

   b).Inta uu tabo kala duwan ku hubiyo arrinta ayuu qaadi go'aan maamul ama

   t). Wuxuu arrinta hor dhigi golaha oo uu ka go'aamin
5. Goluhu arrimaha ku xusan qodob hoosaadyada (2) iyo (4) (t) ee qodobkan lagu soo gudbiyo inta uu baadho ayuu go'aan ka soo saari.
6. Arrinta ku xadgudubka xuquuqeed hadii aanay ahayn mid joogta ah oo maalin walba socota xubinka dhibka tirsanaya waa in uu cabashada ku soo gudbiyo lix bilood gudahood laga bilaabo maalinta xadgudubka loo gaystay. Hadii aanu cabashada ku soo gudbisan xubinku mudadan waxaa loo tirin

cabasho mudadeedu dhaaftay oo aan soo dhawaysigeedu u gudbayn golaha kale ee xiga.

7. Af-hayeenku wuxuu dhaqan galin islamarkaana fulintooda daba gal ku samayn go'aanada golaha ee ku xusan qodob hoosaadyada (4) iyo (5) ee qodobkan.

**Qodobka 104aad**. **Ilaalinta Anshaxa**

1. Xubinka ku xad-gudba ama dhaqan galin waaya arrimaha anshaxa iyo nidaamka golaha ee lagu xeeriyay x/nidaameedkan wuxuu goluhu ka qaadi taalabada anshax ee ku haboon.
2. Xubin kasta oo golaha ka tirsan marka uu u arko in lagu xadgudbay nidaamka anshax ee u dajisan golaha wuxuu golaha u soo jeedin karaa in tallaabo anshax Marin laga qaado xubin kasta oo falkaas ku kacay.
3. Arrimaha lagu bayaamiyey qodob hoosaadka 2aad ee Qodobkan waa in qoraal loogu soo gudbiyo af-hayeenka golaha islamarkaana la soo raaciyo wixii caddaymo ah.
4. Af-hayeenku arrinta codsiga ah ee la hor keenay ayuu u gudbin gudiga joogtada ah ee arrimaha maamulka iyo sharciyada kaas oo warbixintooda soo hordhigaya golaha iyadoo goluhuna inta uu ka baaraandago uu ka soo saarayo go'aan Kama dambays ah.
5. Xubinka arrinta anshax xumadda ah lagu soo eeddeeyay wuxuu xaq u leeyhay inuu is-difaaco.
6. Eedda anshax xumada ee lagu eeddaynayo xubinku way hadhaysa haddii aan lagu soo gudbin hal sano gudaheed

marka laga bilaabo maalinkii la gaystay islamarkaana uma wareegayso mudada shaqo ee golaha xiga.

7. Goluhu wuxuu qaadan mid ka mid ah talaabooyinka anshax marineed ee hoos ku xusan isagoo tixgalinaya sida ay u kala horeeyaan tallaabooyinku;

   b) Digniin af ah

   t) Digniin qoraal ah

   j) Xayiraad aan ka badnayn labo kalfadhi

   x) Marka khaladku yahay mid culus ama soo noq noqday in si sharciga waafaqsan xubinnimada looga saaro.

8. Xubinka lagu fuliyo go'aanka ku xusan qodob hoosaadka (7) xarfkiisa (X) waxaa go'aanka loo gudbin golaha doorashooyinka qaranka in uu hab waafaqsan sharciga uga guto kaalinta kaga aadan.

9. Xubinka aan ku qancin go'aanka ganaxa ee af-hayeenku si waafaqsan xeer-nidaameedka uga qaatay wuxuu cabashadiisa muddo labo cisho gudahood ugu soo gudbin karaa gudiga joogtada ah ee arrimaha maamulka iyo sharciyada.

10. Gudigu cabashada loogu soo gudbiyo hab waafaqsan qodob hoosaadka (9) ee qodobkan inta uu baadho ayuu warbixinta iyo ra'yi go'aameedkiisa u gudbin golaha islamarkaana ka go'aamin.

## Qaybta Shan Iyo Tobnaad

## Guddiyada

**Qodobka 105aad Xeerin Guud**

Hadii aan si kale loogu xeerin x/nidaameedkan gudiyada waxaa lagu hoggaamin qodobada ku faah faahsan qaybtan.

**Qodobka 106 aad Qaab dhismeedka Gudiyada**

Sida uu dhigayo qodobka 48aad (3)(X) ee xeerkani goluhu wuxuu yeelan gudiyada hoos ku xusan:-

1. Guddiga xidhiidhinta
2. Guddiyada joogtada ah
3. Guddi-hoosaad
4. Guddi kumeelgadh ah

**Qodobka 107 aad wajibaadka xubnaha guddiga ka saran ka qaybgalka Shirarka Guddiyada**

1. Shirka guddiga waxaa hoggaamin guddoomiyaha wuxuuna qabsoomi marka wax ka badan kala badh xubnuhu ay joogaan (50 + 1).
2. Guddoomiyaha guddi kasta ka hor shirku inta aan u bilaamin waa in uu xaqiijiyo dhamaystirka kooramka islamarkaana ogaysiiyo xubnaha
3. Guddoomiyaha guddigu waa in uu xaqiijiyo diyaarinta waxyaabaha ku haboon habsami u qabsoomida shirka.
4. Waa in xubnaha gudiga loo sii qeybiyo qoraalada (documents) la xidhiidha arrimaha shirka lagaga hadlayo.
5. Ajande maalmeedka guddi kasta waxaa soo curin karaa hogaaminta ama guddi-hoosaadyada waana in lagu ansixiyo cod 1/3(saddex dalool hal) ee xubnaha guddiga.

Ajeendayaashu sida ay u kala horeeyaan waxaa go'aamin guddoomiyaha guddiga.

6. Wakhtiga uu qaadanayo wada hadalka shirku soconayo waxaa soo dhawayn hogaaminta shirka waxaana ansixin guddiga.
7. Shirka guddiga waxaa lagu wadi af-soomaali iyadoo la adeegsan karo turjumaan marka guddigu dhagaysanayo ama loo soo gudbiyo maragyo iyo caddeymo.
8. Goobta shaqo ee rasmiga ee guddigu waxay noqon xafiisyo ama hoolka loogu tala galay ee gudaha dhismaha golaha. Hase-ahaate, guddigu shirkiisa wuxuu ku qabsan karaa meel ka baxsan gudaha dhismaha golaha marka uu ka helo ogolaanshaha af-hayeenka.
9. Marka Hoggaaminta ama guddigu ay lagama maarmaan u arkan waxay qaban karan shir ka baxsan Kan rasmiga ah (joogtada ah).
10. Xubin kasta oo gudiga ka tirsan waa in uu shirka gudiga ka qayb qaato marka laga reebo in uu ku baaqdo ogolaanshaha gudoomiyaha ama sabab macquul ah oo awoodiisa ka baxsan.
11. Xubinka shirka gudiga uga baaqda sababo awoodiisa ka baxsan awgeed waa in uu ogaysiiyo gudoomiyaha gudiga.
12. Go'aanada gudigu waxay ku ansaxmayaan cod hal dheeri ah ee xubnaha shirka ka qayb qaatay. Marka codka xubnuhu is le'ekaado fikirka uu raaco ama tageero gudoomiyuhu ayaa noqon go'aanka gudiga.
13. Marka goluhu aanu hawl galka ahayn islamarkaana ay jirto hawl deg deg ah oo gudigu in ay qabtan ay tahay gudoomiyaha gudiga, ayaa xubnaha iskugu yeedhi karaa.

14. Marka shirka gudigu uu baaqdo ama aanu bilaami Karin saacada loogu tala galay gudoomiyaha gudigu waa in uu xubnaha ogaysiiyo ama la socodsiiyo arrinta soo kordhay.

**Qodobka 108aad** **<u>Hoos taga</u>**

1. Guddi kasta wuxuu hoos taga golaha.
2. Iyadoo aan waxba loo dhimayn xeerinta qodob hoosaadka (1) ee qodobkan guddi hoosaadyadu waxay hoos tagan gudiga aasaasay.

**Qodobka 109aad** **<u>Mudada shaqo</u>**

1. Mudada shaqo ee gudigu waa mudada shaqo ee golaha.
2. Wakhtiyada shaqo ee gudigu waa wakhtiyada shaqo ee golaha.

**Qodobka 110aad** **<u>Caddeymaha</u>**

1. Maragnimada gudigu uu dhagaysanayo qarsoodi in loo hayo iyo inkale waxaa go'aamin gudiga.
2. Waxaa reeban iyadoo aan la helin ogolanshaha gudiga in la qabto ama la badalo caddeymaha qoraalka ah ee loo soo dhaweeyay gudiga

**Qodobka 111aad** **<u>Warbixinta</u>**

Gudi kasta warbixinta waxqabadkiisa iyo hawlaha inuu qabto loo xil saaray ayuu u dhawayn golaha, Af-hayeenka ama gudiga uu hoostago isagoo adeegsanaya gudoomiyaha.

**Qodobka 112aad** **<u>Qaab dhismeedka gudaha iyo hanaanka shaqo</u>**

1. Gudi kasta si uu hawlihiisa u dardargaliyo wuxuu aasaasi karaa gudi hoosaad hoos yimaada oo xubnihiisa uu iska dhex doorto islamarkaana u xilka iyo waajibaadkiisa uu xadeeyo gudigu.
2. Gudi kasta hadba sida loogu baahdo wuxuu lahaan shaqaale taakulayn.
3. Gudi kasta wuxuu si waafaqsan xeer-nidaameedkan u soo saaran karaa awaamiir la xidhiidha hanaankiisa shaqo.

## <u>Qaybta Lix iyo Tobnaad</u>

## <u>Gudiga xidhiidhinta</u>

**Qodobka 113aad** **<u>Qaab Dhismeedka</u>**

1. Gudiga xidhiidhintu wuxuu ka koobnaan xubnaha hoos ku xusan;

b). Af-hayeenka

t). Af-hayeen ku xigeenka

j). Gudoomiyaha iyo ku xigeenada gudiyada joogtada ah

x). Madax xafiiseedka golaha

kh). Wakiilada xisbiyada siyaasadeed ee golaha ku leh kuraas dhan toban iyo wax ka badan

2. Gudiga xidhiidhinta waxaa gudoomiye u ah oo hogaamin af-hayeenka golaha
3. Madaxa xafiiska goluhu waa xog-hayaha gudiga xidhiidhinta

**Qodobka 114 aad** **<u>Xilka iyo waajibaadka gudiga xidhiidhinta</u>**

Gudiga xidhiidhintu wuxuu lahan xilka iyo wajibaadyada hoos ku xusan;

1. Wuxuu xidhiidhiyaa isku dubaridaa islalmarkaana daba gal ku sameeya taabagalka geedi-socodka hawlaha guud ee gudiyada joogtada.
2. Wuxuu qiimeeya islalmarkaana jiheeya arrimaha muhiimka ah iyo hawlaha guud ee gudiyada joogtada ee golaha.
3. Wuxuu kala saara islamarkaana u xil saara gudiyada joogtada hay’adaha dawliga ah ee ay dabagalka iyo koormeerka ku sameynayaan.
4. Marka la aasaaso xafiisyo cusub ama isbadal lagu sameeyo qaab dhismeedka hay’adaha dawlada ayuu ku meeleeyaa gudiga joogtada ah ee ay khusayso in uu dabagal iyo koormeer ku sameeyo isagoo ka duulaya dabciiga shaqo ee xafiiska.
5. Wuxuu hubiyaa (baadhaa) islamarkaana ka qaada talaabo sixitaan ee ku haboon qorshayaasha iyo warbixinada waxqabadka gudiyada joogtada ee golaha.
6. Wuxuu soo diyaariya islamarkaana go’aamiyaa ajaandayaasha iyo hanaanka qoondaynta wakhtiga dooda iyo hadalka golaha.
7. Wuxuu go’aamiyaa oo uu qoondeeyaa wakhtiga ajande kasta loogu tala galay ee looga hadli karo.
8. Wuxuu golaha u soo dhaweyn karaa ra’yi qabyo ah oo la xidhiidha wax ka badalka xeer-nidaameedkan hanaanka shaqo iyo anshaxa xubnaha golaha marka uu lagama maarmaan u arko.
9. Iyadoo ay sideedada yihiin qodobada kale ee lagu xeeriyay xeer-nidaameedkan wuxuu fasiraa xeer-nidaameedkan.
10. Wuxuu soo saaraa awaamiir ama habracyo lagu fulinayo xeer-nidaameedkan.

11. Wuxuu soo diyaariyaa islamarkaana hordhiga golaha miisaaniyada qabyada ee sanadka ah ee golaha.
12. Wuxuu daba gal iyo koormeer ku sameeya shaqaalaha, maamulka maaliyada iyo hantida golaha marka uu lagama maarmaan u arkana wuxuu u gudbiyaa af-hayeenka natiijada si uu talabooyin u qaado.
13. Wuxuu dabagala islamarkaana isku duba ridaa hawlaha la xidhiidha muuqaalka sumcadeed ee goluhu ku leeyahay deegaanka, wadanka iyo caalamka
14. Wuxuu daraasad ku sameeyaa tabaha iyo marxaladaha kor loogu qaadi karo waxtarnimada waxqabadka gudiyada joogtada ee golaha
15. Wuxuu ka dooda islamarkaana go'aamiyaa arrimaha kale ee ay u soo gudbiyaan af-hayeenka ama gudiyada joogtada ah ama xubnaha gudiga xidhiidhintu.
16. Wuxuu Golaha u gudbiyaa ra'yi go'aameed ku sabsan in la dhiso ama la asaaso gudi cusub oo joogta ah.

**Qodobka 115aad** **<u>Mudada shirka</u>**

1. Shirka joogtada ee gudiga xidhiidhintu wuxuu noqon bishiiba mar.
2. Af-hayeenku wuxuu awooda in uu shir deg deg ah iskugu yeedho xubnaha gudiga.

## <u>Qaybta Todoba iyo Tobnaad</u>

## <u>Gudiyada Joogtada ah</u>

**Qodobka 116 aad Qaab dhismeedka**

1. Gudi kasta oo joogta ah wuxuu ka koobnan Shan illaa todoba xubnood.
2. Gudi kasta oo joogta ah xubnihiisa marka lagu daro Gudoomiyaha iyo ku xigeenka waxaa soo xuli af-hayeenka waxaana laga dhex dooran xubnaha golaha.
3. Xubinku hal gudi wax ka badan xubin kama noqon karo
4. Marka ay xubnaha gudiga joogtada ah dhinmaan waxaa loo buuxin si waafaqsan qodob hoosaadka (2) ee qodobkan.
5. Xubinka rabba in uu ka baxo xubinnimada gudiga jootada ah waa in uu codsigiisa qoraal ugu gudbiyo af-hayeenka ama gudiga waxaana loo tirin in uu ka baxay gudiga laga bilaabo wakhtiga uu af-hayeenku shaaciyo.
6. Xubinka ka tirsan gudiga joogtadu marka uu sabab macquul ah la'aanteed si is-daba joog ah uga hadho wax ka badan saddex shir oo isku xiga ra'yi go'aameedka uu gudigu u soo dhaweeyo golaha ayuu goluhu kaga xayuubin karaa xubinnimadiisa.

**Qodobka 117aad Xilka iyo waajibaadka gudiga joogtada**

1. Gudi kasta oo joogta ah wuxuu lahan xilka iyo wajibaadyada guud ee hoos ku xusan :-

   b). wuxuu baadhaa islamarkaana warbixin iyo ra'yi go'aameed ku saabsan shuruucda qabyada u gudbiya golaha.

   t). wuxuu daba gal iyo koormeer ku sameeya hay'adaha dawlada

   j). wuxuu curiyaa sharci qabyo ah

   x).Wuxuu qaabilaa xogaha iyo cabashooyinka loo soo gudbiyo.

Kh). Wuxuu dhagaysta maragyada islamarkaana qaabila caddeymaha qoraalka ah.

d). Wuxuu sameeyaa daraasad la xidhiidha ujeedooyinka loo aasaasay.

r). Wuxuu diyaariyaa bandhigyo iyo fagaarayaal doodeed oo kala duwan.

s).Wuxuu sameeyaa tabo uu waaya aragnimo ku soo kordhisan karo.

Sh).Wuxuu qabta hawlaha kale ee golaha ama af-hayeenku u xil- saaro.

2. Gudi kasta waxaa waajib ku ah in uu xaqiijiyo hawlaha uu qabanayo in ay ka madax banaan yihiin eex, jinsiyad islamarkaana in ahmiyad gaar ah uu siiyo hawlaha daryeelka deegaanka iyo qaybaha bulshada ee liita.

**Qodobka 118aad** **<u>Xilka iyo Waajibaadka Gudoomiyaha Iyo Ku Xigeenka Gudiga Joogtada Ah</u>**

1. Gudoomiyaha gudiga joogtadu wuxuu lahaan xilka iyo waajibaadka hoos ku xusan;

b). Wuxuu hogaamiyaa, isku dubaridaa islamarkaana suga nidaamka shirka gudiga.

t) Wuxuu golaha ama af-hayeenka u gudbiyaa warbixinta waxqabadka gudiga joogtada ah.

j). Wuxuu xidhiidh la sameeyaa cid saddexaad isagoo matalaya gudiga.

x). Wuxuu isku dubaridaa yeedhitaanada maragyada iyo Marti sharafeedka loo samaynayo.

Kh). Marka uu lagama maarmaan u arko wuxuu xubnaha iskugu yeedha shir deg deg ah oo ka baxsan kan joogtada ah.

d).Wuxuu maamulaa shaqaale hoosaadka gudiga.

r).Wuxuu qabtaa hawlaha kale ee af-hayeenku ama gudigu u xil saaro.

2. Gudoomiye ku xigeenka gudiga joogtadu wuxuu lahaan xilka iyo waajibaadyada hoos ku xusan;

b) Wuxuu matalaa islamarkaana qabta hawlihiisa gudoomiyaha gudiga marka aanu joogin.

t) Wuxuu xaqiijiyaa in si wanaagsan loo xafido qoraalada (documents) iyo minityada gudiga.

j) Wuxuu koormeer ku sameeya xubnaha gudiga ee shirka ka qayb gala iyo kuwa aan ka qayb galin.

x). Wuxuu qabtaa hawlaha kale ee gudiga ama guddoomiyuhu u xilsaaro.

**Qodobka 119[aad]** **<u>Shirka Gudiga Joogtada</u>**

1. Shirka joogtada ah ee gudiga joogtadu wuxuu noqon mid la qabto shan iyo tobankii maalmoodba hal jeer galinka hore 9:00-12:30 iyo galinka dambe 2:00-5:30
2. Xubnaha gudiga joogtada iyadoo aan loo baaqin ayay ka qayb galayaan shirka joogtada ah mudada iyo saacada shirka.
3. Wax aan ka ahayn marka ay jiraan marxalado khaas ah xubnaha aan ka tirsanayn gudiga joogtadu shirarka gudiyada joogtada cod la'aan ayay kaga qayb gali karan.

4. Marka ay jirto arrin ay gudiyada joogtadu wada jir uga shirayaan waxaa shir gudoon noqon oo hogaamin shirka gudoomiyaha gudiga hawshu ay khusayso ee soo agaasimay shirka.

**Qodobka 120aad** **Baadhitaanka Sharciga Qabyada**

Gudi kasta oo joogto ah wuxuu baadhitaanka warbixinta iyo ra'yi go'aameedka sharciga qabyada ah ee loo soo gudbiyo diyaarintiisa u adeegsan karaa tabaha soo socda;

1. Wuxuu tashi la xidhiidha sharciga qabyada ah la sameeyaa xirfadlayaasha sharci.
2. Wuxuu diyaariyaa fagaarayaal shacabku kaga tala bixiyo sharciga laguna uruuriyo fikradahooda.
3. Wuxuu u' baaqaa hay'adaha bah wadaagta shaqo ee ay arrintu khusayso ama shaqsiyaal si ay taladooda uga dhiibtaan sharciga qabyada ah.
4. Wuxuu gudigu baadhitaan ugu gudbiyo arrinta gudi hoosaad.
5. Wuxuu soo qaataa aqoon korodhsi iyo waaya-aragnimo.
6. Wuxuu tabo kala duwan ugu baaqaa Marti sharafeed sida talafoon, fax, ama qoraal taas oo baaqu ka koobnaan doono macluumaadyadan hoos ku xusan;

b).Ajandaha shirka

t).Goobta iyo goorta shirka

j).Gudiga joogtada ah ee shirka qabanaaya iyo ciwaankiisa. x).Hay'adaha ama shakhsiyada aan ka soo qayb gali Karin shirku in ay taladooda ku aadan ajandaha shirka qaab u sahli karaa ay ku soo gudbiyaan waa in uu ka koobnaado.

7. Fagaaraha tala bixinta shacabka ee lagu uruurinayo fikirkooda hadba sida ay suurta gal u tahay ama ay ugu haboon tahay waxaa lagu qaban gudaha xarunta golaha ama goob ka baxsan.
8. Gudiga joogtadu wuxuu diyaarin islamarkaana isku duba ridi qaab lagu garan karo liistada magacyada dadka dooda fagaaraha ka qayb qaadanaaya iyo calaamada galitanka shirka loogu talagalay.
9. Gudiga joogtadu sharciga qabyada ee loo gudbiyay hadii uu arko mid qaba dhib aasaasi ah isagoo arrinta ogaysiinaya af-hayeenka ayuu sharciga qabyada dib ugu celin hay'ada ay khusayso si ay sixitaan ugu soo sameyso.

**Qodobka 121aad** <u>**Doodaha laga yeelanayo sharciga qabyada**</u>

1. Fagaara-yaasha doodaha wada tashiyada iyo talla bixinada xirfadlayaasha, xeel dheerayaasha ama shacabka ee la xidhiidha sharciga qabyada waxaa loo hogaamin nidaamka hoos ku xusan :-

b) Gudoomiyaha gudiga joogtada ah ayaa marka hore soo bandhigi ajandaha laga hadlayo islamarkaana is bari marti sharafta iyo ka qayb qaatayaasha.

t). Marti sharfta ayaa ka qayb qaatayaasha u soo bandhigi sharaxaada iyo tafaasiirta ku saabsan sababaha loogu baahday sharciga qabyada ah iyo waxyaabaha muhiimka ah ee uu sharcigu ka kooban yahay.

j).Waxaa fursad la siin xubnaha gudiga joogtada ah iyo ka qayb qaatayaasha kale in ay soo jeediyaan su'aalo ama tallooyinka ay ka qabaan ajaandayaasha shirka.

x).Su'aalaha iyo tallooyinka la soo jeediyay ayaa fursad loo siin in xirfadlayaashu jawaabaha iyo tafaasiirta ku haboon ka bixiyaan.

kh). Sida ku cad xarfka ''**x**'' tafaasiirta iyo sharaxaada ay bixiyeen xirfadlayaashu ayaa mar labad fursad loo siin ka qayb qaatayaasha in ay ka dhiibtaan su'aalo ama tallooyinka ay qaban.

d).Mar labbad waxaa fursad la siin xirfadlayaasha in ay ka jawaabaan su'aalaha iyo tallooyinka la soo jeediyay.

r). Gudooomiyaha gudiga joogtada ayaa soo jeedin tallooyinka gunaanadka ajaandaha islamarkaana u dhigi jihooyin kadibna sidaa ku soo xidhi shirka.

s).Iyadoon waxba loo dhimayn sida ay iskugu xigan hawlaha ku xusan qodob hoosaadka (1) ee qodobkan ayaa wuxuu godoomiyaha gudiga joogtadu marka ay dooda shirku socoto uu sameyn karaa dhex gal khaasatan arimaha la xidhiidha in laga jawaabo ama la faah-faahiyo, arrimaha aan laga jawaabin, in lagu soo noqdo mawduuca marka laga baxo, inuu saxo fikiradaha sida khaladka ah loo fahmo ama loo turjumo iyo guud ahaan in la xushmeeyo nidaamka shirka ayuu door wayn ka qaadan karaa.

sh). Gudiga joogtadu fagaarayaasha xog uruursiga sharciga qabyada ee uu la yeelanayo xirfadlayaasha ama shacabka hadba sida ay xaaladu u saamaxdo si isdaba joog ah ayuu u qaban karaa.

c) . Gudigu wada tashiga iyo doodaha uu la yeelanayo xirfadlayaasha sharci ee uu talla bixintooda ka uruurinayo wuxuu ku qaban karaa meelo ka baxsan fagaaraha talla bixinta shacabka.

**Qodobka 122aad** **<u>Dabagalka iyo Koormeerka Hay'adaha Dawlada</u>**

1. Gudi kasta oo joogta ah geedi socodka daba galka iyo koormeerka ee hay'adaha dawlada wuxuu fulin hawlahan hoos ku xusan;

b).Marka hore wuxuu uruursan xogo buuxa oo la xidhiidha hay'adaha si uu u helo fikir buuxa islamarkaana wuxuu baadhitaan ku sameyn shuruucda, xeerarka iyo awaamiirta lagu aasaasay hay'ada dawliga ah iyo qoraalada kale ee muhiimka ah.

t).Wuxuu codsan in loo soo gudbiyo islamarkaana u baadhi qorshe sannadeedka hay'ada dawliga.

j). Wuxuu qiimayn warbixinta waxqabadka lix biloodlaha ee hay'ada wuxuna hal jeer dhagaysan warbixinta sanadlaha.

x). Marka uu lagama maarmaan u arko wuxuu golaha u gudbin natiijada warbixinta daba galka iyo koormeerka.

2. Hanaanka soo dhawaynta warbixinada hay'adaha dawlada ee lagu xeeriyay qodobada 56-60 ee x/nidaameedkan ayaa hadba sida ugu haboon loogu adeegsan dhagaysiga warbixinada hay'adaha dawlada.
3. Gudi kasta oo joogto ah geedi socodka daba galka iyo koormeerka ee hay'adaha dawlada wuxuu u raaci karaa

hanaanka shaqo ama qaadi karaa talaabooyinka hoos ku xusan;

b). Marka uu lagama maarmaan u arko wuxuu golaha u gudbin warbixn uu ku dalbayo in hay'ada dawliga ah lagu sameeyo baadhitaan xisaabeed.

t) Marka ay geedi socodka uga soo baxdo dhibaatooyinka hay'adu in ay yihiin kuwo sharciyada la xidhiidha, sida uu dhigayo qodobka 52 (5)(b) ee x/nidaameedkan wuxuu ku tala bixin in la buuxiyo ama wuxuu diyaarin sharci qabyo ah oo lagu buuxinayo god daloolada sharci ee hay'ada wuxuuna hor dhigi golaha.

j). Wuxuu dabagal iyo koormeer ku sameyn hay'adaha dawlada isagoo ka duulaya macluumaadka bulshadu ay u soo gudbiso.

x). Sida uu dhigayo qodobka 52(5) (j) wuxuu ogaysiin xafiiska dabagalka iyo koormeerka uu ku sameeyay dhibaatooyinkiisa islamarkaana wuxuu ku amri in uu iska saxo dhaqan galnimada go'aankana daba gal ayuu ku sameyn.

kh).Dhibka lagu arko xafiiska hadii uu yahay mid aasaasi ah sida ku cad qodobka 52(5)(X) in laga qaado tallaabo sharci ayuu warbixin iyo ra'yi go'aameed u gudbin golaha.

d) Gudi kasta oo joogto ah marka uu dabagalka iyo koormeerka hay'adaha dawliga ah ku jiro wuxuu dhagaysan karaa ama baadhi karaa maragyada iyo caddeymaha qoraalka ah wuxuuna faah faahinta fulinta u raaci karaa sida uu dhigayo qodobka 61aad ee x/nidaameedkan.

r). Gudi kasta oo joogto ah marka uu lagama maarmaan u arko in uu gaadho goobta shaqo ee hay'ada ayuu tagi karaa islamarkaana daba gal iyo koormeer ayuu ku soo sameyn karaa.

s). Gudiga joogtada marka uu ku jiro hawlaha dabagalka iyo koormeerka waxaa ka reeban in uu galo hawl maalmeedka shaqo ee xafiiska, ku xadgudbo xoriyadaha, madaxbanaanida iyo shuruucda kale ee xafiiska u yaala.

sh). Marka uu gudiga joogtadu dhagaysanayo warbixin waa in uu ka bilaabo xafiisyada hoose ilaa kuwa sare ee ay hoos tagaan isagoo ka duulaya sida ay isku hoos tagaan.

**Qodobka 123aad** **<u>Curinta Sharci</u>**

Guddi kasta oo joogta ah iyago racaya awaamiirta u goluhu siiyo ama ka duulaya hawlaha guud ee ay ka shaqeeyaan ama ka ambaqadayaa raciyada uga yimaada hay'adaha dawliga ee ay dabagalaan islamarkaana kormeeran ayay sharci ka soo diyaarin karaan.

**Qodobka 124aad**. **<u>Qaabilada cabashooyinka iyo Xogaha</u>**

1. Guddi kasta oo joogta ah xogaha ama cabshooyinka loo soo gudbiyo waa in ay xaqiijiyaan in ay arrintu hoostimaado awoodooda shaqo.
2. Guddi kasta oo joogto ah xogaha ama cabashooyinka loo soo gudbiyay marka ay baadhan waxay qaadi karan talaabooyinka hoos ku cad.

b).Iyagoo kala xaajoonaya hay'adaha ay arintu khusayso waxay suurtogalin sidii/in xal loo helo.

t). Qaar ka mid ah xubnaha ayay ku amri in ay arinta soo baadhan islamarkaana ay raaci raci' go'aameed ay u soo dhaweeyaan.

j). Hay'adaha dawladeed ee ay arintu khusayso oo wargelin ama amar ay siiyaan.

x). Racyi go'aameed inta ay ka diyaariyaan oo ay golaha u soo bandhigaan.

Kh). Guddigu xogaha ama cabashada go'aanka Kama dambaysta ee ay ka gaadheen oo hadi loo baahdo ay la socodsiiyan xog bixiyaha ama cida ay arintu khusayso.

3. Qodobada 63 iyo 64 ee xeerkan ayaa iyadoo haboonaanta la eegayo dhaqanka ku ah.

**Qodobka 125aad.**<u>**Warbixinaha iyo Raciyii Go'aameedka**</u>

1. Guddi kasta waa in ay warbixin la xidhiidha waxqabadka shaqo u soo diyaariso guddida ama hay'adda ay hoos tagto.
2. Guddida si toos ah golaha u hoos yimaada warbixinta waxqabadkooda waxay u soo gudbiyaan golaha, qabka warbixinta & cida soo gudbinaysa waxay noqonaysa sida uu dhigayo qodobka 46aad ee xeerkan.
3. Qaabka ay warbixinta u soo gudbiyaan guddi hoosaadyada sida tooska ah u hoos taga guddiyada waa sida ku xusan faraqada 2aad ayaa intay masuuliyiintooda ka saxeexaan ayay qoraal ahaan ugu gudbiyan guddida ay hoos tagan.
4. Warbixinta & ra'yi go'aamadka lagu diyaarinayo sida uu dhigayo faraqda 2&3 ee qodobkani waxay xan-baarsanaan arrimahan hoos ku xusan:-

b). Guddigu arinta wixii uu ka qabtay.

t). Dadaalka laga sameeyay hawlaha la qabtay & xeeladaha loo adeegsaday.

j). Dhibaatooyinka ka hor yimaada & talaabooyinkii lagu xaliyay.

x). Waxyaabihii ugu waynaa ee ka soo baxay geedi socodka shaqada.

kh).Talo bixinta & ra'yi go'aameedka guddiga.

d).sumada ra'yi go'aameedka.

r).Cida soo gudbisay ra'yi go'aameedka.

**Qodobka 126aad. Fagaaraha Dood-Cilmiyadeedka Ee Ay Guddiyada joogtadu Diyaarinayaan**

Gudiyada goluhu markasta oo ay lagama maar maan u arkaan;

1. Waxay diyaarsan karan golayaal aqoon iswaydaarsi iyo
2. Dood-cilmiyeed lagu sameeyo arimaha la xidhiidha xilka iyadoo tilmaanta lagu bayaamiyay faraqada 1aad ee qodobkan oo sideeda ah guddidu arimaha hoos ku xusan ayay aqoon iswaydaarsiyo & fagaare dood-cilmiyeed ka diyaarin karaan:-
3. Arimaha u bahan ka qayb gal balaadhan oo dadwayne.
4. Arimaha mawqaf muhiima ah lagu qadanayo.
5. Arimaha la xidhiidha hirgalinta istaraatijiyada & booliisyada qaran iyo deegaanba
6. Helitaanka khibrad wadaagyada kala duwan.
7. Arimaha la xidhiidha xilka & wajibaadka hay'adaha cusub ee la asaasayo.
8. Arimaha la xidhiidha qaab shaqeedka guddida & golaha.
9. Arimaha ku saabsan xeerarka & bayaanada.
10. Waa in ay goob jog ka ahadan dhmaan hay'daha ay khusayso.
11. Dhibaatooyinka xasaasiga ah ee ugu waawayn deegaanka.
12. Aqoon iswaydaarsiyada & dood-cilmiyeedka ay guddida golahu diyaariyaan waa in ay buuxiyaan shuruudaha hoos ku xusan;

b). waa in ay ku jirto qorshe sanadeedka gudiga.

t) dood-climiyeedka & aqoon is waydaarsigu waa in uu leeyahay qorshe u Gaar ah.

j) Inay ogolaatay ama fasaxday hay'adihii ay khusaysay.

x) In loo qondeeyay misaaniyadii loogu baahna hawsha.

kh) in ay ka soo wada qayb galaan hay'adaha ay khusayso.

**Qodobka 127aad. Soo Jeedinta Guddiyada Joogtada**

1. Iyadoo la dhawrayo arrimaha lagu xeeriyay shuruucda kale, guddi kasta oo joogto ah waxay bixin karan tafasiil ku sabsan shaqooyinkooda.
2. Guddi kasta oo joogto ah hay'adaha ay dabagalaan waxay ku amri karaan in ay tafasiil bixiyaan.
3. Tafaasisha lagu bixinayo hab wafaaqsan farqada 1 iyo 2 ee qodobkan waa in marka hore la hela ogoolaanshaha Afhayeenka.

**Qodobka 128 aad. Anshaxa xubnaha Guddiyada Joogtada ah**

Iyadoo qodobada kale ee xeerkani ay sidooda yihiin xubnaha guddiyada joogtada ah waa in ay ku dhaqmaan arrimaha hoos ku cad;

1. Ilaalinta sacaadaha shaqada.
2. Masuuliyada loo idmaday ama shaqada loo xilsaaray in ay si dareen leh u fuliyaan.
3. In ay shaqada hanaanka midho dhal ah u fuliyaan.
4. In macaamiisha loo qaabilo hanaan dhexdhexaada ah, caadaaliya islamarkaana ka madaxbanaan dhaqamada aan loo bahnayn oo wafaaqsan sharciga.
5. Habsami u isticmaalka khayraadka iyo hantida loo qoondeeyay shaqada.

**Qodobka 129 aad. Guddi Hoosaad**

1. Guddi hoosaadku wuxuu hoostaga guddiga dhisay.

2. Waxay yeelan Gudoomiye iyo ku xigeen u garaa.waxaa dhaqangal ku ah Hadaba sida ay ugu haboon yihiin qodobada ku taxaluqa guddiyada joogtada ah ee xeerkan.

**Qodobka. 130 aad. <u>Guddi ku meel Gaadha</u>**

1. Goluhu markasta oo lagama marmaan loo arko wuxuu dhisi karaa gudi ku meel gaadhi.
2. Xilka iyo waajibaadka guddiga ku meel gaadhka ah waxaa cayimi golaha.
3. Guddiga ku meelgaadhka ahi wuxuu hoostagayaa golaha
4. Tirada xubnaha Guddiga ku meelgaadhka waxaa go'aamin Golaha wuxuna yeelan gudoomiye iyo kuxigeen u goluhu doorto.
5. Guddiga ku meelgaadhku marka u guto waajibaadka u Goluhu u xilsaaray waa la kala diri.
6. Guddiga ku meelgaadhkii wuxuu dejsan karaa hanaan shaqo oo u gaara.

***<u>Qaybta Sideed Iyo Tobnaad</u>***

***<u>Shaqooyinka Gaarka Ee Guudiyada joogtada</u>***

**Qodobka.131aad. *<u>Guddiga Joogtada ee Arrimaha Maamulka Iyo Sharciyada</u>***

1. Guddiga joogtada ee arrimaha maamulka iyo sharciyadu wuxuu yeelan shaqooyinka hoos ku cad;

**b**). Wuxuu dabagalaa islamarkaana la socda in hanaanka shaqo ee arrimaha maamulka iyo cadaalada ee deegaanku hab-wafaqsan dastuurka loo dhisay loona hirgaliyay.

**t**). Wuxuu dabagalaa islamarkaana kormeeraa habsami u dhaqan galinta xuquuqaha iyo xoriyadaha asaasiga ee dastuurka lagu xeeriyay.

**j**). Wuxuu xaqiijyaa in bulshadu ay hesho adeeg cadaaladeed oo xor ah, cadaaliya oo dhakhso badan.

**x**). Wuxuu ku dabagala islamarkaana kormeera abuurida nidaam iyo hanaan shaqo oo sahli karaa xakamaynta iyo ka hortaga hab-shaqeedka u nugul musuqa iyo hab dhaqanka xun.

**Kh**). Wuxuu dabagalaa islamarkaana kormeeraa habsami u meel marinta qorshayaasha istiraajiyadaha, shuruucda iyo siyaasadaha caddaalada iyo maamulka.

**d**). marka loo bahdo Goluhu Qormooyinka sharci ee ay u gudbiyaan Guddi kasta oo joogto ah ayay dulucda sharci badhaan.

**r**). Wuxuu baadha arrinta ku cad qodobka 48(5) ee dastuurka ee xasanaad ka qaadista iyo xuquuqaha iyo arrimaha anshax ee xubnaha la xidhiidha.

**2.** Guddiga joogtada ee arrimaha maamulka iyo sharciyadu waxay kormeer iyo dabagal ku sameyaan hay'adaha dawladeed ee hoos ku cad.

**b).** Xafiiska madax-waynaha

**t).** Xafiiska maamuka cadaalada & nabadgelyada

**j).** Komishiinka Booliska

**x).** Xafiiska xeerilaalinta Guud iyo Cadaalada

**kh).** Maxkamadaha

**d).** Xafiiska Golaha

**r).** Hay'adaha kale ee Guddiga xidhiidhintu u xilsaaro.

**Qodobka 132 aad** **<u>Guddiga Joogtada ee Arrimaha Haweenka, dhalinyarada iyo caruurta</u>**

Guddiga Joogtada ah ee arrimaha Haweenku waxay fulin waajibaadka hoos ku cad:-

I. Wuxuu dabagalaa islamarkaana xaqiijiyaa ilaalinta iyo ka fa'iidaysiga haweenka ee xuquuqaha asaasiga ee haweenka ee lagu cadeeyay dastuurka.
2. Waxay baadhaan islamarkaana in la badalo sahlan shuruucda cadaadiska ku ah haweenka iyagoo raciya in sharci cusub la curiyo.
3. Waxay xaqiijin marka bayaano iyo qorshayaal la ansixinayo ama la soo sarayo in ayna ka muuqan eex, jinsiyadeed iyo caadadis.
4. Iyadoo la tixgelinayo yasidii iyo takooridii noqotay dhaxaalka taariikheed ee haweenka, si loo helo sixitaan arrinta la xidhiidha waxay xaq u leeyihiin inay helaan talaabooyin taaageero oo dheeraad ah oo ay ka faa'iidaystaan.hadafka talaabooyinkaasi wuxuu noqonayaa mid dhinacyada siyaasada, bulshada, dhaqaalaha iyo dhismayaasha kale ee dawlada iyo kuwa gaar ahaaneedba haweenku uga qayb qataan, kuna helaan tixgelin gaar ah oo u suurto galisa in ay si siman ula tartamaan raga ayay sahlan.
5. Waxay dabagalaan islamarkaana la socdaan sugida xaq haweenku u leeyihiin in ay yeeshaan hanti, maamulaan,

kormeeraan, adeegsadaan, ay cid kale ku wareejiyaan islamarkaana ay dhaxlaan.

6. Waxay xaqiijiyaan islamarkaana dabagalaan sugida xaqa ay haweenku una siman yihiin raga arrimaha shaqaalaynta, dalacaada, mushaarka iyo gudbinta xaqa hawlgabka.
7. Wxay la socdaan islamarkaana xaqiijinta tabagalinta xaqa ay haweenku u leeyihiin in lagala tashado diyaarinta hirgalinta qorshayaasha siyaasadeed iyo horumarineed ee deegaanka,gaar ahaan kuwa saamaynta tooska ku leh haweenka oo ay hanaan dhamaystiran fikirkooda uga dhibtaan islamarkaana siyaasadaha arrimaha haweenka si buuxa looga dhaqangaliyo hay.adaha kale gedisan.
8. Waxay dabagalaan islamarkaana u kuurgalaan shuruucda, dhaqamada iyo cadooyinka haweenka u keenaya cadaadis iyo waxyeelo gaadhi karaa jidhkooda ama damiirkooda oo ay ka xoroobaan dhaqamada xun.
9. Waxay xaqiijiyaan islamarkaana u kurgalaan tabagalinta haweenku u leeyihiin helitaanka waxbarashada qorshaha qoyska ee u sahlaysa in ay haweenka ka hor tagan dhibaatooyinka cafimaad ee ka soo gaadha uurka iyo dhalmada.
10. Waxay haweenka siiyaan taageerada ku haboon in ay sugaan islamarkaana u halgamaan xaqa ay haweenku u leeyihiin in ay isku abaabulaan Hadaba baahida iyo noocyadooda rabitaan.
11. Waxay xaqiijiyaan islamarkaana badagalaan in guud ahaan dhaqdhaqyada shaqo ee ay wado dawlada deegaanku ay

yihiin kuwo xaqiijinaya xaqa ka qaybgalka ay haweenku u la siman yihiin iyo in ay si siman uga faa'iidaystaan loona xaqiijiyo hab wafaaqsan dastuurka iyo siyaasadaha dawladda.

12. Wuxuu dabagala xafiiska arrimaha haweenka

**Qodobka 133 aad. <u>Guddiga Joogtada ee Arrimaha Bulshada & Kobcinta Awooda</u>**

1. Guddiaga joogtada ee arrimaha bulshada iyo kobcinta awoodu waxay yeelan /qaban hawlahan:-

b). waxay xaqiijin islamarkaana dabagalaan fidinta siyaasadaha guud ee deegaanka ee horumarinta bulshada iyo isteraajiyadaha adeegyada caafimad iyo dabargoynta waxyaabaha khatarta ku ah

t). Wxay u kurgalan islamarkaana la socdaan hawlaha lagu hakinayo fafida xanuunka HIV/Aids-ka

j). Waxay la socdaan islamarkaana dabagalaan adeegyada damaanada bulshada.

x).Waxay la socdaan islamarkaana dabagalan meelmarinta barnaamijyo la halmala jid-jiifka, wayeelka laxaadka daryeelka dhalaanka iyo dhimista shaqo la'aanta iyo arrimaha kale bulsho.

Kh).Waxay dabagalan islamarkaana xaqiijiyaan habsami u meelmarinta qorshayaasha, istiraatijiyadaha, siyaasadaha iyo shuruucda ku taxaluqa horumarinta bulshada, caafimaadka, dhalinyarada iyo ciyaaraha.

d) Wuxuu dabagalaa islamarkaana xaqiijiyan habsami u dhisida (abuurida) bulsho iyo cudud waxbaratay oo leh ka go'aanansho, karti, tayo iyo aragti dimoqradiyadeed oo mudo

gabaan si balaadhen deegaanka uga tabagalin kartaa horumaar waraa.

r) Waxay xaqijiyan in la kobciyay (dhisay) awooda qorshayneed iyo fulineed ee hay'adaha dawlada.

2. Guddiga joogtada ee arrimaha bulshada iyo kobcinta awoodu waxay kormeer iyo dabagal ku sameeyaan hay'adaha dawladeed ee hoos ku cad.

b).Xafiiska waxbarashada

t).Xafiiska caafimaadka

j)Xafiiska warfaafinta dhaqanka iyo dalxiiska

x).Machadka maamulka iyo maaraynta

kh).Xafiiska abaabulka,dhalinyarada iyo ciyaaraha

d).Xafiiska kobcinta awooda

r).Xafiiska maamulka shaqaalaha dawlada

s).wakaalada shaqaalaha iyo arrimaha bulshada.

Sh). Xafiiska ka hortaga iyo xakamaynta HIV/AIDS.

Dh) Hay'adaha kale ee dawlada ee ay guddiga xidhiihdintu ay u xilsaran.

**Qodobka134.<u>Guddiga Joogtada Ee Horumarinta Kabayaasha Asaasiga</u>**

1. Guddiga joogtada ee arrimaha Horumarinta Kabayaasha Asaasiga waxay qaban hawlaha hoos ku cad:-

b).Waxay kormeeraan islamarkaana dabagalaan habsami u dhaqangalinta siyaasadaha istiraatijiyadaha iyo barnaamijyada dhaqaale ee dawlada dhexe iyo deegaankaba ka soo baxay.

2. Guddiga joogtada ee Horumarinta Kabayaasha Asaasiga hay'adaha dawladeed ee hoos ku cad ayay kormeer iyo dabagal ku sameeyaan:-

b).wakaalada malgalinta

t).Xafiiska ganacsiga, gadiidka iyo warshadaha

j).Xafiiska hawlaha guud iyo horumarinta magaalooyinka

x).Wakaalada horumarinta jidadka miyiga

kh).Shirkada dhismaha hawlaha biyaha

d).iyo hay'adaha kale guddiga xidhiidhintu u xilsaaro.

Qodobka 135aad :- **<u>Guddiga Joogtada ee arrimaha maaliyada iyo miisaaniyada</u>**

Guddiga joogtada ee arrimaha maaliyada iyo miisaaniyadu waxay yeelan awoodaha iyo wajibaadka hoos ku cad;

1. Waxay xaqijin in miisaaniyada sanadeedka iyo miisaaniyada dheeriga ee dawladda hanaan sax ah loo ansixiyay
2. Waxay xaqijin in miisaaniyada in kabista ah ee la siiyo magaalooyinka iyo degmooyinka la wafaajiyo qaciido.
3. Waxay in lacagta iyo hantida dawladda deegaanka si sax ah wakhtiga ku haboon loo soo uruuriyay.
4. Waxay dabagalan in siyaasadaha horumaarinta dhaqaale, shuruucda , istiraatijiyadaha iyo qorshayaasha maaliyadeed ee deegaanka si haboon loo dhaqangaliyay

5. Guddiga joogtada ee arrimaha miisaaniyada iyo maaliyadu waxay kormeer iyo dabagal ku samayn ha'yadaha dawladdeed ee hoos ku cad;

b). xafiiska maaliyada iyo horumaarinta dhaqaalaha

t). wakalaada dakhliga

j). hay'adaha kale ee guddiga xidhiidhintu u xilsaaro.

**Qodobka 136aad** **<u>Guddiga Joogtada ee Horumarinta Xoolo Dhaqatada</u>**

Guddigu waxay yeelan awoodaha hoos ku cad:-

1. Waxay xaqijiyaan in dawladu ay dajisay islamarkaana si habsami leh u meel maarisay qorshayaal iyo istirajiyad bulshada xoolo dhaqatada ah loogu gaadhsiin karo horumar waara.
2. Waxay xaqijin in deeganada bulshada xoolo dhaqaatada loo abuuray adeegyada jidadka, sayladaha xoolaha, cafiimadka dadka iyo xoolaha, suqgaynta, dugsiyo waxbarasho oo ku haboon xaladooda nolooleed iyo sidoo kale dhamaan adeegyada kale.
3. Waxay kormeer iyo dabagal ku sameyan hay'adaha kala ah:-

b) Xafiiska xoolaha, dalaga iyo horumaarinta miyiga

t) Xafiiska biyaha, macdanta iyo tamarta

j) Wakaalada iskaashatooyinka

x) Mashuurca horumaarinta bulshada xoolo dhaqatada

kh) hay'adaha iyo masharicaha guddiga xidhiidhintu u xilsaaran.

Qodobka 137. **Guddiga joogtada ee dagabalka xisaabaadka dawladda**

Guddiga joogtada ee dagabalka xisaabaadka dawladdu wuxuu yeelan awoodaha iyo wajibaadka hoos ku cad;

1. Wuxuu dabagali islamarkaana u la socoon in miisaaniyada u goluhu u qoondeeyay qaybaha dawladda si haboon loo isticmaalay.
2. Guddigu waxay baadhi (falanqeeyn) warbixinta hanti-dhawrka guud , marka ay baadhista samaynayan waxay hubin islamarkaana ay dabagali:-

b). in miisaaniyadii la qoondeeyay lagu bixiyay ujeedadii iyo adeegi loogu talagalay.

t). in lacagta la isticmaalay ay fasaxday (xaqijisay) cidii awooda sharci u lahayd

j). haddii la sameeyay wax miisaaniyada wareejin ah in loo maray nidaamka iyo sharciga maamulka maaliyada.

3. waxay qiimeeyan natijada baadhista hantiyeed ee hanti dhawraha guud sameeyay.
4. marka ha'yad kasta oo dawladdeed ay ku sifoowdo isticmaalka miisaaniyada dhaafsan cadaadka miisaaniyadeed ee loo qoondeeyay waxay golaha u soo dhaweeyn warbixin iyo talo-bixin ku haboon.
5. waxay suurtogalin in hab wafaaqsan natijada warbixinta baadhista hanti-dhawr la qaado talaabo ku haboon.
6. Waxay kormeeri islamarkaana dabagali in si habsami leh loo dhaqangaliyay siyaasadaha, shuruucda iyo barnaamijyada dalka iyo deegaanka ee la halmaala shaqooyinka guddiyada.

7. waxay dabagalan xafiiska hanti-dhawrka guud

## Qaybta sagal iyo Tobnaad

## Wakiilada Asxaabta siyaasadeed (party whips)

**Qodobka 138aad.Qodobo Guud**

Xisbi kasta oo siyaasadeed oo golaha ku leh toban kursi iyo wixii ka sareeyaa waxay golaha ku yeelan hal wakiil xisbi

**Qodobka.139aad. Magacaabista iyo u Tirsanaanta Wakiilada Xisbi**

1. Wakiilka dawlada waxaa magacaabi madax-waynaha deegaanka
2. Wakiilka dawladu wuxuu hoos tagi madax-waynaha Deegaanka
3. Xisbiga mucaaradka 1aad iyo wakiilada xisbiyada kale waxaa magacaabi gudoomiyeyaasha xisbiyadaas waxayna hoos tagi gudoomiyeyaasha xisbiyada.

**Qodobka 140aad Xilka iyo waajibaadka wakiilada xisbi**

**1.** Wakiilada asxaabtu waxay yeelan awoodaha iyo waajibaadka hoos ku cad:-

**b).** Xubnahoodu ayay ajandayaasha golaha la sii socodsiyaan.

**t).** Waxay sahlaan in xubnahoodu ay shirka golaha ka soo qaybgalaan islamarkaana ay codka siiyaan xisbigooda.

**j).** Waxay ka sii shaqeeyaan hawlo hor dhac oo sahlayaa in xubnaha golaha ee ka tirsan xisbiga talada hayaa ay guud ahaan ay shaqadooda diyaar u ahaadaan islamarkaana ay firfircooni ku dheehan tahay.

**x).** Waxay qybaha ay khusayso u gudbiyaan liistada xubnaha xisbigooda uga qaybgalaya guddiyada kala gedisan ee golaha iyo hawlaha kale ee xisbiga.

kh). Wuxuu nqon bundada isku xidha hogaaminta sare ee xisbigooda iyo golaha xubnaha u matalaya xisbigooda sidii uu uga dhex abuurmi lahaa jawi isku xidhnaansho.

**d).** Marka uusan joogin wuxuu wakiisha in ay matalaan xubnaha kale ee golaha.

**s).** Wuxuu xisbiga la socodsiiyaa arrimaha la xidhiidha xubnaha sababo kala gadisan si rasmi ah u baneeya Golaha islamarkaana in qaab dorasho buuxin la qabto ayuu ra'yi go'aameed u gudbiyaa

**2.** Arrimaha ku cad farqada 1aad ee qodobkan waxaa dheer oo awoodaha iyo waajibaadka wakiilka dawladu noqon sida hoos ku cad:-

**b).** Wuxuu dawlada kala talin hawlaha iyo hanaanka shaqo ee golaha islamarkaana hab wafaaqsan jihada ay dawladu dajiso ayuu hawlaha u fulin.

**t).** Ajandayaasha ay dawladu golaha u soo dhawayso ayuu isgoo kaashanaya afhayeenka hab socodkooda dajin ialamarkaana waxay u qoondayn wakhti ku filin oo laga doodo.

**j).** Wakiilada asxaabta kale ayay ajandayaasha golaha kawada tashadaan

**x).** Wuxuu xidhiidh shaqo oo adag la sameeyaa mas'uuliyiinta sare ee maamulka deegaanka.

**kh).** Wuxuu u kuurgalaa islamarkaana xubnahooda la sii socodsiiyaa ajandayaasha barnaamij ee xiligaas taagan ee

dawladu ku yeelanayso golaha sidoo kale wuxuu sahlaa in xubnuhu fikir ka haystaan barnaamijyada taagan.

**3.** Arriamah ku cad farqada 1aad ee qodobkan ka sokow wuxuu afhayeenka ama wakiilka sare ee dawlada kala tashada ama kala xaajooda baaxada wakhti ee wakiilada xisbiyada kale ee goluhu ajandayaasha ama shuruucda qabyada ah ee golaha horkeenayaan baaxda wakhti ee ay u bahan tahay.

**Qodobka 141aad.Xuquuqaha Wakiilada Xisbi**

1). wakiilada xisbi waxay yeelan xuquuqaha xeerkan lagu siiyay xubin kasta oo ka tirsan golaha.

2). Arinta ku cad farqada 1aad waxaa dheer xuquuqaha in ay helaan adeegyada, lacageed iyo faa'iidooyinka kale oo fahfaahsan waxaa lagu xeerin awaamiir.

**Qodobka 142aad. Siyaabaha Bulshada Loogu Qeexaayo/Bayaaminaayo Shaqooyinka Uu Goluhu Ama Guddigu Qabtaan**

Iyadoo la dhawrayo shuruucda adkaynaysa ama xakamaynaysa dhaqdhaqaaqyada shaqo ee ay wadaan Golaha ama Guddi waxa bulshada iyo qaybaha kale ee ay khusayso lagula socodsiin iyadoo loo sii marinayo qaybta xidhiidhka dadwaynaha ee xafiiska.

**Qodobka 143aad. <u>Xogaga Amaanka</u>**

Marka uu goluhu shirayo ama uu gudanayo shaqo malmeedka golaha Afhayeenku isagoo kala xaajoonayo qaybaha ay khusayso wuxuu sahli in amaanka la sugo. hananka shaqo oo fahfahsan waxaa xeerin doona awaamiir.

**Qodobka 144aad. <u>Soo Saarida Awaamiir</u>**

Guddiga xidhiidhinta arrimaha goluhu wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro awaamiiraha lagama marmaanka u ah habsami u dhaqangalinta Qodobada xeerkan.

**Qodobka 145aad <u>Shuruucda Aan Dhaqangalka La Hayn</u>**

Sharci ama qaab shaqeed kasta oo ka hor-imanaya qodobada xeerkan ma yeelanayaan dhaqangal sharci.

**Qodobka 146aad. <u>Mudada Dhaqangalka Xeerkan</u>**

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa laga bilaabo maalinta Goluhu Ansixiyo.

**Jig-jiga 6dii bisha Megabit 2002. E.c**

**Maxamed Isaaq Ibraahim**

**Af-hayeenka Golaha**